# MAHADNAQ

Marka kowaad mahad oo dhan waxaa iska leh Allihii inna abuurtay, iinna suurto geliyey innaan buuggaan qoro. Marka labaad waxaan u mahadcelinayaa dhammaan saaxiibdadii iyo aqoonyahannadii ka qayb qaatay xilligii aan buuggaan qorayey, kuwaas oo ku biiriyey feker, sixidda iyo tafatirka buugga qaybka ahaa sida Wasiir Maxamuud Ciise Maxamed (Maareeye), Barkhad Cabdulqaadir Aw-cali, Faarax Cali Yuusuf, Macallin Maxamed Yuusuf Xassan iyo Cabdulqaadir Sheekh Maxamuud, kuwaa oo la'aantood aysan marnaba suurtogal noqoteen in aan buuggaan dhammaystiro.

Ugu dambayn, waxaan jeclahay inaad u mahadceliyo dhammaan saaxiibbadii iyo aqoonyahannadii ii muujiyey dhiirrigelinta iyo isbarbar taagga intii aan waday buuggaan Habqan ee aan ugu talo galay inay Soomaalidu akhrisato, waxna ka kororsato.

# XUQUUQDA BUUGGA

Xuquuqda Buuggaan waxay u dhowrsantahay qoraha oo keliya, sidaa darteed iyadoo aan oggolaansho laga helin cidna xaq uma laha in ay daabacato, badsato ama ay qaadato qayb buuggaan ka mid ah.

Daabacaadii 1aad, Nofeembar, 2018

Shirkadda Daabacaadda: Modern Printing Press

Garoowe, Puntland-Somalia

Wixii talo ama jawaab celin kale ah, fadlan kala soo xiriira qoraha buugga: sahalduuble2018@gmail.com

# TAARIIKH KOOBAN EE QORAHA BUUGGA

Qoraaga Buugga Habqan Axmed Maxamuud Axmed (Sahal Duuble) wuxuu ku dhashay miyiga Degmadda Qardho ee Gobolka Bari sanadkii 1986-kii. Wuxuu qoraagu ku soo barbaaray magaalada Qardho halkaas oo uu kusoo qaatay waxbarashaddiisii Hoose/Dhexe Dugsiga Xaaji Aadan iyo Iskuulka sarre ee Sheekh Cusman. Wuxuu waxbarashadii sarre ka bilaabay Magaalada Boosaaso ee Gobolka Bari, halkaa oo uu ku qaatay heerkiisii kowaad ee waxbarashadda Jaamacadda Bariga Africa, gaar ahaan kulliyadda Maamulka iyo Maaraynta. Qoruhu wuxuu ku diyaariyey waxbarashada heerkiisa labaad Jaamacada Mount Kenya ee dalka Kiinya isagoo bartay maamulka iyo anshaxa (MA in Governance & Ethics), sidoo kale, wuxuu hadda wadaa (2018) waxbarashadii labaad ee heerka labaad ee horumarinta shaqaalaha iyo Cilmu-nafsiga (Organizational Psychology). Wuxuu tababarro iyo aqoon kororsi u tegay dalal badan oo dibadda ah sida Kiinya, Tansaaniya iyo Holland. Qoruhu wuxuu leeyahay ku dhowaad 10 sano oo khibrad shaqo ah, isagoo la soo shaqeeyey hay'addo samafal oo caalami ah iyo kuwo maxali ah ba. Hay'adaha caalamiga ah ee uu la soo shaqeeyey waxaa ka mid ah hay'adda Badbaadada Carruurta (SC) iyo Hay'adda Qaxootiga ee dalka Denmark (DRC) iyo Ururo maxali ah kuwaa oo ka jira Soomaaliya, gaar ahaan Puntland. Wuxuu afartii sano ee ugu dambeysay la shaqaynayey Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Dowladda Puntland ee Soomaaliyeed.

# TUSMADA BUUGGA

**MAHADNAQ** ..... **I**

**XUQUUQDA BUUGGA** ..... **II**

**TAARIIKH KOOBAN EE QORAHA BUUGGA** ..... **III**

**TUSMADA BUUGGA** ..... **IV**

**HORDHAC** ..... **V**

**AFEEF** ..... **VII**

**SHARAXAAD KOOBAN OO KU SAABSAN MAGACA BUUGGA** ..... **VIII**

**GOGOLXAAR** ..... **XI**

***Cutubka 1aad*: Ujeeddooyinka Aan Buugga u Qoray** ..... **1**

***Cutubka 2aad*: Maxaan Mustaqbalkeenna u Saadaalin Wayney?** ..... **10**

***Cutubka 3aad:* Siyaasiyiinta Soomaalida iyo Isbedbeddelka aan Micnaha ku Dhisnayn** ..... **15**

***Cutubka 4aad*: Ku Tiirsanaanta Gargaarka ee Dadka Soomaaliyeed** ..... **18**

***Cutubka 5aad:* Saamaynaha Gaarka ah ee Qurbajoogta Soomaaliyeed** ..... **28**

***Cutubka 6aad:* Isbeddelka Soomaalida ku dhacay Dhanka dhaqanka iyo Afka** ..... **33**

***Cutubka 7aad:* Fahanka Dowladnimo ee Soomaalida** ..... **37**

***Cutubka 8aad:* Heerka Aqoonta ee dalka Soomaaliya** ..... **48**

***Cutubka 9aad:* Dowladda Soomaaliya iyo Sida ay u Shaqayso** ..... **52**

***Cutubka 10aad:* Musuqmaasuqa Dalka Soomaaliya Ka jira Guud ahaan** ..... **64**

***Cutubka 11aad:* Qaabka Maaraynta Howladaha Dowladda iyo Mashaariicda Muhiimka ah** ..... **72**

***Cutubka 12aaad:* Dhibaatooyinka Mareegaha iyo Baraha Bulshada** ..... **75**

***Cutubka 13aad:* Sidee Waddan Lagu Horumarin karaa?** ..... **81**

***Cutubka 14aad:* Waa maxay Dowlad?** ..... **85**

***Cutubka 15aad:* Muhiimmada Door siinta Dadweynaha** ..... **92**

***Cutubka 16aad*: Waa Maxay Adeegga Dadweynaha** ..... **97**

***Cutubka 17aad*: Isbeddel Maxaa Loola Jeedaa?** ..... **99**

# HORDHAC

Buuggaan waxaan qoray ka dib markii aan garwaaqsaday khaladaad badan oo ka dhex jira bulsho weynta Soomaaliyeed, gaar ahaan dhanka nolosha bulsho ee sanadahaan dambe taagan iyo siyaasadaha gurracan ee ay qabatimeen siyaasiyiinta Soomaaliyeed. Buuggaan waxaan ugu talo galay inaan ku iftiimiyo meelo badan oo, aan aamminsanahay in sii dabo dheeraanshaha duruufaha adag ee dalka ka jira ay sabab u yihiin, haddii aan kuwaa xal loo helinna ay adagtahay in aan ka gudubno dhibaatooyinka ay ka mid yihiin maammul xumo, caddaalad-darro, qabiillaysi, musuqmaasuq, colaad, gaajo, tahriib iyo kala qaybsanaan. Waxa aan rumaysnahay in haddii aan fahano dhibaatooyinka ina haysta kuwo ay yihiin, ay fududaan doonto inaan raadinno sidii xalkooda aan u heli lahayn, sidaas darteed buuggaani wuxuu xambaarsanyahay tusaalayaal badan oo ka turjumaaya hanyarida dhallinyarada Soomaaliyeed, kartidarada aqoonyahannada Soomaalida, siyaasadaha aan qaangaarka ahayn ee hoggaamiyaasha Soomaaliyeed, danaystayaasha innala haybta ah iyo qorshe xumada guud ahaan shacabka Soomaaliyeed. Inkastoo Buuggaani tiro ahaan yahay mid kooban haddana waxaa ku jira xogo aad u faro badan kuwaa oo muujinaya waxyaalo aan si fudud u qaadanno ama u samayno balse leh saamayno xunxun oo dhaawac iyo waxyeello badan u geysan kara jiritaankeenna

ummadeed, sidoo kalena mugdi gelinaya mustaqbalkeenna dambe.

# AFEEF

Buuggaan waxaan u qoray inaan isku dayo sidaan u muujin lahaa dhibaatooyinka waddanka ka jira, sidaas darteed waxaan ka afeefanayaa in aanan buuggaan u qorin in aan cid gaar ah ku beegsado ama sharaftooda waxyeello. Tusaaleyaal badan oo aan buuggaan u adeegsaday wax dan ah kama lahayn marka laga reebbo in ay aad ugu dhowyihiin xaaladihii aan markaas cabbirayey, sidoo kale waxaa rabaa inaan raali gelin ka bixiyo wixii gefaf iyo khaladaad ah ee buuggaan laga dhex helo kuwaas oo aan ula-kac ahayn.

# SHARAXAAD KOOBAN OO KU SAABSAN MAGACA BUUGGA

Erayga ***Habqan*** waxaa adeegsada inta badan reer guuraaga. waxay u isticmaalaan xooluhu markii ay yimaadaan guriga ama ceelka biyaha iyagoo qaarba mar soconayaan. Badanaa waa eray loo adeegsado tabar la'aan iyo kala qaybsanaan baahsan oo ka dhexjirta koox isku jaad ah. Si taas ka duwan markii loo adeegsado ereygaan dadka ama binu'aadamka, waxay la micno tahay qof ama dad aan lahayn wax qorshe ah ee hadba halkii ka hortimaada u jeensanaya. Waa eray leh micne ballaaran oo ay adagtahay inaad ku macnayso eray la mid ah, waxaana hubaal ah inay dad badan oo Soomaaliyeed, gaar ahaan dhallinyarada uu eraygaani ku cusub yahay oo aysan horay u maqal. Sidaas darted, waxaan isku deyi doonaa in aan ku sameeyo faahfaahino badan, si loo fahmo waxa eraygaan loola jeedo ka hor inta aadan buuggaan wax kale ka akhrin.

**Sharraxaaddii Erayga Habqan ee khubaradda Afka Soomaaliga ku xeeldheer**.

1. Qaamuuska Afka Soomaaliga ee ay uu qoray Cismaan Yuusuf Keenadiid (1976) ayaa erayga habqamid ku sharaxay (1)Dadaal isaga dabo dhicid (2) Isdaba joog (3) Xiriir

2. Qaamuuska Afka Soomaaliga ee ay qoreen Annarita Puclielli iyo Cabdalla Cumar Mansuur (2012) ayaa erayga habqan ku micneeyey (1) Socod daal iyo dhibaato darteed dad wada socda ku kala haraan (2) Dhawaaq dad kala dambeeya isdhaafsanayaan.

Sidoo kale, Gabay uu tiriyey abwaan Soomaaliyeed, oo lagu magacaabo Cabdinaasir Qarshe, uuna ugu magac daray "HABQAN" ayaa wax badan oo sharraxaad ah ka bixinaya ereyga Habqan sida hoos ku qoran:

*Soomaaliyeey haldoorkii la waa, heellin jiray waaye*

*Ku habsaame jaad iyo wax daran, oo habaarqaba'e*

*Qaar way habaabeen sidii, ido habeensadaye*

*Habqankoodu ways daba socdaa, har iyo laylkiiye*

*Majiirahay hayeen baa ka lumay, welina may heline*

*Haraawayaasha u tashaday, wey ka haageene*

*Haad gaajo haysaa daldalay, oo hamuun qaba'e*

*Giddi habar dugaag baa harqaday, oo waxba hambayne*

*Shisheeyaa hoggaanka u hayoo, haga dhammaantoode*

*Hindise ay iyagu leeyihiin, maba hawaystaane*

*Hadhkii loo tilmaamay maraan, oo lagu hagaajaaye*

*Qayrkood waxay uga hareen, waa dhibkaa helaye*

*Hebednimo umay baaqsanine, Hibooy ha eedaynin.*

# GOGOLXAAR

Mahathir Bin Mohamed oo labo jeer Ra'iisalwasaare ka noqday dalka Malaysiya ayaa qoray buug uu u baxshay-*The Malay Dilemma* (Kala doorashada labo daran ee dadka Reer Malay), 11 sano ka hor inta uusan noqon Ra'iisalwasaare, waxa uu buuggiisa si qotodheer ugu lafa-guray dhibaatooyinka dalkaas haystay xilligaas iyo waxyaalaha uu dareensanaa inay dhibtaas keenayaan. Wuxuu sidoo kale aad ugaga hadlay Mahathir buuggiisa waxyaabaha uu u arkayey in looga gudbi karo caqabadaha taagnaa xilligaas uu buugga qorayey. Inkastoo Mahathir uu dhaleecayn iyo wax ka sheeg badan oo aad u daran kala kulmay xisbigii uu ka tirsanaa iyo dadweynaha dalkaas; haddana kama aysan hor istaagin in uu fikirkiisa ka dhaadhiciyo dadka dalkaas, iyo inuu ku kasbado sumcaddii u horseeday inuu noqdo Ra'iisalwasaare dalkiisa ka dhigay mid ka mid ah waddamada adduunka ugu horreeya dhanka ilbaxnimada, ganacsiga, siyaasadda iyo horumarka dhaqaalaha.

Mudane Mahathir buuggiisa wuxuu xoogga ku saaray qowmiyad ka mid ah qowmiyadaha dalkaas dega, taas oo ah qowmiyadda Malayga ee uu ka dhashay. Wuxuu xilligaas aamminsanaa in ay ka hooseeyaan qowmiyadaha kale ee dalkaas dega; kuwaas oo tiro ahaan ka yar sida qowmiyadaha Shiinaha, Hindida iyo Indunuusiyaanka. Si gaar ah, buugga wuxuu xoogga ku saaray

labo arrin oo waaweyn kuwaas oo kala ahaa; isirka dadka Malayga iyo saamaynta bey'ada ay ku nool-yihiin. Si taas la jaad ah Buuggaan waxaan qoray ka dib markii aan garwaaqsaday gefaf badan oo ka dhexjira bulshada Soomaaliyeed. Gaaar ahaan qorsha la'aanta inta badan dadweynaha Soomaaliyeed ee dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, dhaqanka iyo kaalinta gobol ama caalam iyo dhibaatooyinka soo noqnoqda. Waxaan ugu talo galay qofka akhriyaa buuggaan in uu si fudud u fahmo halka Soomaaliya hadda joogto bulsho ahaan iyo siyaasad ahaanba. Waxaa hubaal ah haddii aadan ogeyn halka aad joogto in ay adagtahay inaad raadiso xalka dhibaatooyinka aad ka cabanayso. Sidaas darteed, ujeedka aan buuggaan u qoray waa si aan u hoga-tusaaleeyo bulshoweynta Soomaaliyeed meesha ay maanta joogto iyo waxyaabaha iigu muuqda in lagu dawayn karo khaladaadkaas dhaqan, bulsho iyo siyaasadeed ee gurracan. Waxaan rajaynayaa in uu buugaani qayb ka noqdo xalka dhow ee Soomaaliya, sidoo kalena uu cod u noqdo dad badan oo dareenkaan ila qaba laakiinse, aan hellin fursad ay kusoo gudbiyaan.

# *Cutubka 1aad*: Ujeeddooyinka Aan Buugga u Qoray

Waxaan go'aansaday in aan buug qoro dhowr sano ka hor, hase yeeshee iimma aysan suurtogelin xilligaas marka laga reebo in aan daabacay dhowr qormo oo daarnaa xaalado gaar ah, oo markaas taagnaa. Qorista buuggaani waxay ahayd mid ka timid waayo-aragnimadii aan ka helay socdaalo aqoon korarsi oo dalka dibaddiisa ah. Gaar ahaan, waxaan hadda ka hor fursad aqoon karorsi ka helay dalka Holland. Ka dib markaan isku hubsaday fursaddaas tababar ee waqtiga gaaban, ayaan waxaan u sheegay dhallinyaro aan saaxiibbo ahayn, kuwaas oo i siiyey talooyin kala duwan oo ah waxaan samayn doono markaan Yurub tago. Laakiin waxaan weli xasuustaa jawaabtii koobnayd ee uu talo ahaan ii siiyey mid ka mid ah saaxiibbada aan aad ka ugu tabaayey fekerka wanaagsan iyo talooyinka fiican. Taladaasi waxay ahayd tababarka tag oo ka qaybgal, ka dibna halkaan ha kusoo noqon ee Yurub meel ka mid ah iska dhiib. Balse waxaan u sheegay in aan magaca Soomaaliya ku socdo oo inkastoo aan fursaddaan u helay si shaqsi ah oo cid kale aysan iga taageerin haddana aan ahay qofka keliya ee Soomaaliga ah ee tababarkaas ka qayb galaya, aysana habboonayn in aan magaca waddankayga oo kasoo kabanaaya dhibaatooyin badan aan dhankayga ka waxyeelleeyo,

laakiinse markale ayuu saaxiibkay si fudud oo aan dhib badnayn iigu jawabaay, wuxuuna igu yiri:

*“Immisa qof oo Soomaali ah ayaa magaca Soomaaliya maalinkasta waxyeellaynaya? Ma keligaa ayaa ilaalinaya sharafta Soomaaliya? War ninyahow todobaadka hore su’aalo badan waydii oo ismuuji, ka dibna waddamadaas kale uga sii gudub oo baasaboor soo qaado”*

Waxaa aad ii cajabisay sida fudud ee uu tusaalaha macquulka ah iigu soo qaatay saaxiibkay, taasina waxay igu dhalisay in aan markale ka fekero sidii aan yeeli lahaa. Feker dheer kadib, waxaan go’aansaday in aanan waxba ka beddelin go’aankaygii ahaa in aan soo laabto maaddaama saamaynta ay yeelan karto, haddii aan qaato go’aan kaas ka duwan ay ahayd arrin waxyeellayn karta magaca aan ku abtirsado; iyo sidoo kale fursaddaha tababar ama waxbarasho ee ay heli lahaayeen Soomaalida kale ee iga dambeysa. Ma ahayn keliya saaxiibkay dadka aan ka helay taladaas, laakiinse, waxay ahayd talada ugu badan ee ay iisoo dirayeen asxaabtii aan markaas ku tuhmaayey aqoon, dal jacayl iyo karti, kuwaa oo aan ku kalsoonaa inaysan marnaba igula taliyeen wax aan ku habboonayn mustaqbalkayga dambe iyo kan dalkayga toonna. Waxaan garwaaqsaday in dad badan, oo aad uga fekera mustaqbalkooda iyo mustaqbalka carruurtooda, waxna bartay oo leh aqoon iyo waaya-aragnimo ku

filan, in aysan wax rajo ah ka qabin dalka, fursaddaas oo kale haddii ay mar qura soo martona aysan iska dayaceen. Waxaan isweyddiiyey sababta ka dambaysa in dad badan oo Soomaaliyeed iyagoo ladan oo waddanku u baahan yahay ay sidaas uga cararayaan? Jawaabta iisoo baxday ayaa noqotay; in aan Soomaali badni aysan lahayn wax qorshe ah oo cad; balse ay ka fekerayaan oo keliya in wakhtiga iyo waayuhu u taliyaan. Taas waxaan ula jeedaa, inkastoo ay dadkaasi  wax barteen, fursaddo shaqo ka heleen dalkooda hooyo, u adeegayaaan dadkooda iyagoo ku jira duruufo kala geddisan iyo xaalado qallafsan, ayna muujinayaan sida ay ugu kalsoonyihiin dalkooda haddana uma diyaarsana sidii ay ku ilaashan lahaayeen sharaftooda iyo qaranka ilaahay u beeray.

Malaha wax qorshe fog ama dhow ah, asii waxay isu beddelayaan sida xayawaanka la yiraahdo Jirjirroolaha ama Roorka. Jirjirooluhu waa xayawaan yar oo inta badan jooga dhulka miyiga ah; wuxuu u egyahay hadba sida ay u egtahay meesha uu cagta saaro. Tusaale ahaan, haddii uu marayo dhulka wuxuu u egyahay dhulka, haddii uu marayo meel doog ah oo cagaaran, wuxuu u egyahay doogga iyo cagaarka, Haddii uu joogo meel midab kale leh wuxuu u egyahay midabka uu markaas dhexmarayo. Marka si taas la mid ah haddii aan u wada fekerno, waxaa hubaal ah in aynu halis ku sugannahay jiritaankeenna adduun ee dambe iyo xataa keenna aakhiro-ba.

Waxaan go'aankaygii kusii adkaystay markii aan tegey waddankii Yurub ee aan u socday, gaar ahaan, markii aan caga dhigtay garoonka diyaaradaha Schiphol, ee magaalo madaxda dalka Holland ee Amsterdam. Garoonku waa mid aad u mashquul badan oo ka mid ah garoomada Qaaradda Yurub kuwooda ugu mashquulka badan. Waxay ahayd xilli gelin dambe ah, sidoo kale waxaa jiray qabow aad u daran iyo roob aan badnayn. Ka dib markii aan kasoo degay diyaaradda waxaan soo beegsaday mid ka mid ah meelaha lagu hubiyo dikumiintiyada Sodcaalka (Travel Documents), gaar ahaan baasaboorrada (Passports). Waxaan galay saf dheer, kaas oo igu qaatay waqti inaan gaaro qofkii hubinayey dukumiintiyadda safarka (Passport Control Unit). Ilaa 10 ama 15 daqiiqo waan taagnaa ugu yaraan, laakiin markii aan soo gaaray oo u dhiibay baasaboorkaygii wiil dhallinyaro ah, waxaa isbeddelay wejigiisii. Waxa uuna wacay telefoonka dadwaynaha ee loo yaqaan Landline. Waxa uu la hadlay qof kale, anna wuxuu iga codsaday inaan wax yar sii taagnaado, isagoo aan iweydiin waxkale oo xog ah. Isla markiiba waxaa noo yimid gabar ilaaladda garoonka ka mid ah, oo aan dareemayey inay aad u xiiqsanayd ama u naxsanayd maaddaama ay neef-tuuraysay sidii qof naxsan ama xiiqsan oo meel fog ka soo orday. Gabadhaasi waxay ahayd qof aad u hubaysan ama aad u qalabaysan maaddaama ay sidatay dhammaan waxyaalaha fudud ee ay qaataan dadka ilaalada ahi sida bistoolad, Toorray/Mindi, Ul

iyo waxyaabo kale. Waxay qaadatay baasaboorkaygii, waxayna iga codsatay inaan raaco iyadoo aan waxba i weydiin. Haddaan waxyar soconnay, meel aan meeshii ka fogayn ayey iga codsatay in aan fariisto oo sugo, anna waxaan ahaa oday maanta oo dhan marna safar ahaa, marna saf tagnaa ee waxaan u fariistay si fiican. Waxay gashay meel aan filayey inay joogaan masuuliyiin iyada ka sarreeya. Waxyar ka dib way igusoo laabatay, waxayna i waydiisay: "Maku hadashaa Afka Ingiriiska? Waxaan ugu jawaabay "Haa" Markaas ka dib ayey i waydiisey sababta aan halkaan u imi. Waxaan u sharraxay ujeeddada aan dalkooda u imi; sidoo kale waxaan siiyey caddaymo muujinaya safarkayga, sida warqaddii cusumaadda tababarka, warqad caddaynaysa damaanad caafimaad iyo hoteelkii aan degi lahaa. Waxay mar kale la laabatay xogtii aan siiyey, taasoo keentay ugu dambayntii in nin oday ah uu ii keeno dhammaan alaabtaydii iyo baasaboorkaygii oo lagu dhiftay shaabbaddii oggolaanshaha inaan dalkaas galo. Hase ahaatee, waxay ahayd xilli dadkii aan wada soconay ay mar hore u bakhooleen meelihii ay u socdeen, maaddaama ay wateen dhalashooyin waddamo ka aammin badan tii aan sitay.

Markaas ayaan soo xasuustay taladii saaxiibkay. Waxaan ogaaday in saaxiibkay uu saxnaa, marka loo eego qaabka aan hadda u dhaqanno. Waxaan dareemay inaan aan wato baasaboor aan lahayn xushmad, baasaboor ay dadkiisii dayaceen, baasaboor dadka sitaa adduunka intiisa badan ka yihiin dembiilayaal,

baasaboor ay ka cararayaan dadkiisu ayna doonayaan baasaboorro dadyow kale. Waxaan isweyddiiyey sababta aynu u doonayno dhalashooyinka dadyow u arka baasaboorkeenna mid aan qiimo lahayn? Jawaabta ay maskaxdaydu isiisay waxay noqotay in dadka Soomaaliyeed ay yihiin dad aan ka fekerayn sharaftooda iyo jiritaankooda ummadeed; maaddaama aqoonsiga dhalashadu ka midtahay waxyaabaha ugu muhiimsan markii laga hadlayo dad ahaan iyo dal ahaanba!.

Haddii intii dibadda horay u tagtay ay si kastaba haku tagtee ay soo heleen dhalashooyin leh xasaanad oo dadka wata la ilaasho sharaftooda, innaguna intaas ka dhigannay madax, siinnay karaamo dheeri ah, isla markaana aan u hibeynay dhammaan mustaqbalkeennii, sow ma nihin kuwo habqan ah oo aan lahayn wax qorshe ah, aananna qiyaasi karin halka ay u socdaan?

Haddaan fiirinno dowladihii soo maray Soomaaliya burburkii ka dib iyo sida dadka wata baasaboorrada dalalka shisheeye ay fursado dheer ah u heleen, waxaad dareemaysaa sababta dhallinyaro badan oo Soomaaliyeed ku kalliftay inay ka tagaan dalkooda hooyo, iyagoo maraya safarro sharcidarro ah oo dhib badan; iyo waddooyin halis badan. Waddooyinkaas oo in badan oo ka mid ahi ay ku waayaan naftooda ka hor inta ayan gaarin riyooyinkoodii. Tusaale ahaan, haddaan waxyar ka milicsanno dowladda hadda jirta (2018) iyo tii ka horraysey, golahooda

Wasiirrada iyo sida dhalashooyinka shisheeya dadka wataa ay u helaan fursad ka fiican tan ay helaan dadka aan dhulka ka bixin oo aan haysan dhalashooyinka shisheeye. Sida lagu sheegay maqaal lagu qoray Wargayska caanka ah ee “The Economics” oo loogu yeeray Soomaaliya “Waddanka ugu liita Waddamada Fashilmay” bishii Sebteembar ee 2016. 55% (konton iyo shan boqolkiiba) golihii wasiirrada ee xilligaasi waxay wateen baasabooro shisheeye. Sidoo kale waxaa isla qormadaas lagu xusay in lataliyeyaashii madaxweynihii xilligaas *Mudane Xasan Sheekh Maxamuud* ay intooda badan haysteen dhalashooyinka waddamada Ingiriiska iyo Maraykanka. Si taas lamid ah baaris ay samaysay mareegta “Wakiil” ayaa lagu sheegay in xukuumadda hadda talada haysa (2018) ee uu Madaxweyne *Farmaajo* hoggaamiyo ay in ka badan 90% golaha xukuumadda ee dowladdaas ay qoysaskoodu ku noolyihiin meelo ka baxsan Soomaaliya.  Baaristiii ay samaysay mareegta “Wakiil” waxaa wax badan sii iftiimiyey hadal uu bartiisa degelka ku qoray Wasiirka Dastuurka ee Dowladda federaalka ah (2018), Mudane *Cabdi Xoosh.* Mar ay is qabteen dowladaha Boqortooyadda Sacuudi Carabiya iyo Kanada oo dowladda Soomaaliya ay la safatay wadanka Sacuudiga iyada oo markaas ku marmarsiinyoonaysa in Kanada gardarantahay, ayna dhexgashay arrimaha maammul ee dalka Sacuudi Carabiya. Wasiirku wuxuu soo qaatay shax muujinaysa inta wasiir ee ka haysata dhalasha

waddanka Kanada oo isaguna ku jiro iyo wasiirka arimaha dibadda isagoo is waydiiyey inta wasiir ee haysta dhalashadda waddanka Boqortooyadda Sacuudi Carabiya. Haddaba inagoo tixgelinayna caddaymahaas kor ku xusan, waxaa isweyddiin mudan sababta lagu doorto dadkaan?

Haddii madaxdeenna ay ka dhabtahay in ay dadka Soomaaliyeed u adeegaan, waa maxay ujeeddooyinka ay ahmiyadda u siin waayeen dadka jooga dalka gudihiisa ee aan haysan dhalashooyinka shisheeye?. Su'aashaas jawaabteeda ayaa ah mid dad badani ay isweyddiinayaan, laakiin haddaan soo qaadano hadal uu sheegay afhayeenkii hore ee Wasaaradda Amniga Soomaaliya Cabdicasiss Xildhibaan, xilli uu la hadlayey dhallinyaro tababar loo xiraayo Maagaladda Muqdisho, bishii Luulyo, 2018. Wuxuu yiri: *"30-kii sano ee lasoo dhaafay waxaa idin haystay siyaasi boorso wata oo aan dantiinna waxba ka gelin, maalinkastana idiin sheega ballanqaad iyo war been ah"*

Sidoo kale, wuxuu sheegay inuu dadka dowladda madaxda ka ah oo uu isaguna ka midka yahay ay wataan dhalashooyin shisheeye oo xataa hadday dhintaan carruurtooda loo biilayo; dalkana ay intooda badan u yimaadeen inay ka shaqaystaan ee aysan dalka iyo dadka Soomaaliyeed midna waxba u hayn. Sidaas awgeed, waxaan marna shaki ku jirin inay daljoogtu ka fiican yihiin qurbajoogta marka laga eego u dhawaanshaha bulshada

maaddaama ay aad ugu wacan yihiin adeegsiga afka Soomaaliga, fahamka duruufaha iyo xeerarka Soomaalida dhexdeeda amaba xurmaynta dhaqanka soo jireenka ah ee Soomaalida, iyo sidoo kale habdhaqanka iyo ilaalinta diinteenna Islaamka.

Sida saxda ah dadkaan haystaa dhalashooyinka shisheeye waxay ku laabtaan qoysaskoodii iyo dalalkoodii markii uu dhammaado xilligooda shaqo, halka kuwa aan haysan dhalashooyinka shisheeye ay dib ugu laabtaan bulshada dhexdeeda maaddaama ayan iyagu haysan fursaddaas oo kale. Markaa waxay ku khasban yihiin intooda badan inay aad uga fekeraan siday dhibka dalka uga saari laahaayeen inta ay leeyihiin awoodda fulineed; si carruurtoodu ay u helaan mustaqbal fiican, waddankooduna u ahaado mid sii jira dal ahaan iyo dad ahaanba. Sidoo kale marna lama inkiri karo in qolyo ka mid ah dadkaas loo yaqaan daljoogtu ay leeyihiin fikrado gurracan, sida lunsasho hanti iyo samaysasho awood ay xilka kadib ku gorgortamaan.

## *Cutubka 2aad*: Maxaan Mustaqbalkeenna u Saadaalin Wayney?

Hanka ummad kasta waxaa lagu gartaa qaabka ay isu maammusho iyo cida ay madaxda ka dhigato. Taas waxaan ula jeedaa inta badan waddamadu waxay leeyihiin siyaasiyiin, ganacsato, aqoonyahanno, dhaqaaleyahanno iyo wixii la mid ah kuwaas oo loo tixgeliyo dhankaas ay ku fiican yihiin ama ay ku takhasuseen, sidoo kale, waxaa jira xarumo tababar oo badanaa la tixgeliyo dadka kusoo tababartay xurumahaas maaddaama ay qabaan carbin waddaninimo iyo mid maammul labadaba.

Sidaas darteed, badanaa waxaa cad in la saadaaliyo qofka waddankaas xilka qaban kara maaddaama markaas ay jirto mawduuc ama arrin muhiim ah oo xallinteeda xoogga la saarayo. Tusaale ahaan, haddii dadka dalkaas ku nool ay dareemayaan dhibaato siyaasadeed ama mid dhaqaale waxay dooranayaan qof ay u arkaan in uu ka saari karo dhibtaas, iyagoo u tixgelinaaya shaqsi ahaan ama xisbi ahaan. Qofkaas oo leh shuruudaha ay iyagu goortaas muhiimmadda koowaad saarayaan. Waxay u badan tahay qofkaas in la doorto haddii uu jiro hannaan doorasho oo hufan, laakiin waa ay dhici kartaa saadaashaasi in aysan suurtoobin. Halkaas ayeynu ka dareemaynaa marka laga tago qorshaha qof ahaaneed ee dadka dalkaas ku nool, inay jiraan qorsheyaal guud oo ka dhexeeya, oo ay tahay in marwalba ay

muhiimmadda siiyaan si ay u ilaashadaan dantooda guud iyo tooda gaar ahaaneedba. Nasiib darro, si ka duwan sidaan kor kusoo sharraxnay, dadka Soomaaliyeed ma laha qorshahaas guud, taasna waxay ka mid tahay sababaha dalkeennu hadba dhinac ugu dhacaayo.

Waxaan rabaa in aan tusaalooyin yaryar soo qaato oo ku saabsan sida aan u nahay kuwo aan qorshe lahayn, aanan aqoon meesha ay u socdaan iyo waxa ay hiigsanayaan. Waxaan kor kusoo xusay inay jiraan waddammo badan oo leh xarumo tababar oo dadka dalkaas lagu tababaro ayna suuragal tahay in qofkii xurumahaas lagu soo tababaro aan looga shekiyin masuuliyadda markaas loo dhiibayo. Xarumahaasi waxay noqon karaan kuwo dowladda ka madax banaan, kuwo rayid ah; laakiinse ay dowladdu maamusho ama kuwo ciidan. Balse si taa ka duwan, Soomaaliya waxaan maalin kasta dooranaa qof aynan horay u aqoon, weligiisna aan kasoo shaqayn xafiis dowladeed, khibraddiisa maammul iyo aqooneedna aysan la jaad ahayn midda markaas aan baahida u qabno. Waxaa dhici karta qofkaasi inuu waddaniyad iyo masuuliyad ahaan kaga fiican yahay kuwo in badan dowladda kusoo jiray oo Soomaalidu wada taqaan, laakiin taasi ma aha sababtii aan ku dooranay ee waxaan u doorannay sabab gaar ahaaneed sida mid qabiil, mid dhaqaale ama mid xisbi aan lahayn sharciyad maaddaama uusan ku imaan fekerka xisbi sharciyad leh oo waddanka ka diiwaangashan.

Waxaan jeclahay inaan tusaale ahaan usoo qaato qayb ka mid ah madaxdii dalka soo martay iyo qaabkii aan ku doorannay. Hase yeeshee, waxaan ka afeefanayaa inaanan ula jeedin wax xumaan iyo aflagaaddo ah, inaan u gaysto madaxdeennaas sharafta iyo maamuuska inaga wada mudan, sidoo kale, aysan ahayn dhaqan aan leeyahay in aan aflagaaddeeyo cid walba oo ay tahayba.

**Madaxweyne Sheekh Shariif Sheekh Axmed** ayaa ka mid ahaa madaxweynayaashii ku meelgaarka ahaa ee dalka soo maaray. Wuxuu xilka hayey mudadii u dhexeysay bishii Janaayo, 2009 ilaa bishii Sebteembar ee 2012. Madaxweyne Shariif ayaa siyaasadda kusoo galay si fudud kuna noqday madaxweyne ka dib markuu iscasilay madaxweynihii ka horreeyey ee Cabdullahi Yuusuf Axmed, kaasoo xilka hayey Oktoobr, 2004 ilaa Diseembar, 2008, ahaana mid halgan ugu jiray noqoshada Madaxweyne Soomaaliyeed muddo dheer. Haddaba, haddaan inyar ka fiirinno qaabka uu ku yimid awoodda Madaxweyne Shariif, waxaad dareemaysaa in doorashadiisii ayan ahayn mid ku salaysan qorshe guud oo dadka Soomaaliyeed lahaayeen ama karti iyo aqoon horay loogu yiqiinay; marka laga reebo inuu madax u ahaa urur diimeed hubaysan kaasoo sabab u ahaa imaatinkiisa, lana filaayey in uu xal keeni doono, maaddaama dad badani aamminsan yihiin ujeedada loo doortay inay ugu wayneyd inuu ardaydiisii iyo saaxiibbadiis fekerkiisa ka dhaadhiciyo oo dowladdiisa uu kusoo daro ama qorshe kale oo nabadeed u

sameeyo. Aniga oo aan rabin in aan wax ka sheego habkiisii maammul iyo waxbarasho, ayaan rabaa in aan idiin dareensiiyo in qaabka ay Soomaalidu wax ku cabbiraan uu yahay mid qorshe la'aan iyo jaah wareer ah, aananna lahayn tiirar iyo hab loo raaco midna. Laakiinse, keliya aad mooddo in ay ku jirto qaab ku dhisan qabiileysi, danaysi, feker gurracan iyo tijaabooyin aan natiijooyinkoodu dhaweyn; taasna laguma ahaan karo dad iyo dal jira oo horumar waara gaara.

**Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud** oo xilka madaxweynenimo hayey muddadii u dhexeysay Sebteembar, 2012 ilaa Febraayo 2017, ayey dadka Soomaaliyeed ku barteen si cajiib ah ka dib markii uu noqday madaxweyne isagoo magaciisaba aan lagu darin dadka markaa xilka loo saadaalinayey ee uu hal mar soo baxay; maaddaama uu ahaa shaqsi aan wax dowlad ah horay uga soo shaqayn. Sidoo kalena aan ku jirin xubnaha firfircoon ee beryahaas siyaasiyiinta noqday. Madaxweyne Xasan oo ahaa madaxweynihii ugu horreeyey ee dalka gudihiisa lagu doorto muddo ka badan 40 sano, sidoo kalena ahaa madaxweynihii ugu horreeyey ee dowladdiisa loo aqoonsado dowlad rasmi ah kadib dowladdii kacaanka ee burburtay 1991-kii, ayaa dalka ka qabtay waxyaabo badan kuwaas oo u badnaa soo celinta xiriirka dibadda ee dalka Soomaaliya, iyadoo sidoo kale ay jireen waxyaabo aad loogu dhaliili jiray in uu ka gaabiyey. Madaxweyne Xasan ayaa horay uga soo

shaqeeyey hay'ado Caalami ah iyo goobo waxbarasho, sidoo kalena lahaa aqoon waxbarasho oo gaarsiisan ilaa heerka labaad; madaxna ka ahaa urur siyaasadeed aan sharciyeysnayn. Balse muhiimmada aan tusaalaha ugu soo qaatay ma aha in aan wax ka sheego qaabkiisii maammul, kiisii waxbarasho ama khibradiisa shaqo ee hore hase ahaatee, waa in aan muujiyo keliya in lagu doortay si qorshe la'aan ah sabab kastaaba ha keentee, maaddaama xilligaas aan loo fiirin xisbi sharci ah oo waddanka ka diiwaangashan ama tijaabo hore oo lagu tijaabiyey maammul dowladeed. Waxaa cad dadkii doortay oo ahaa xubno matelayey dhammaan qabaa'iillada Soomaaliyeed inay jirtay sabab ay markaas ugu qanceen inay u doortaan. Ha ahaato mid feker, mid dhaqaale ama sabab kale. Balse waxaa dhab ah in uusan jirin qorshe guud ee dadkii ama qabiilladii ay dadkaasi matelaayeen ay isku raacsanaayeen marka laga reebo inay si kedis ah magiciisa ku barteen taas oo ah sababta aan rabo inaan idiin tuso in aynu nahay qolo hadba meeshii ka hortimaadda aadaysa.

## *Cutubka 3aad:* Siyaasiyiinta Soomaalida iyo Isbedbeddelka aan Micnaha ku Dhisnayn

Isbedbeddelka Soomaalida iyo inay maalinba dhinac u socdaan oo ayan lahayn qorshe guud ayaa daliil u ah habqanka iyo qorshe xumada daashatay dadka Soomaaliyeed iyo madaxdoodaba. Waxaa jirta oraah ay dadka siyaasadda gorfeeyaa adeegsadaan markay rabaan inay beddelaan mowqifkooda siyaasiga ah ama aragtidooda, taas oo ah: "Siyaasaddu cadow iyo saaxiib joogto ah midna ma leh". Laakiin oraahdaan micnaheeda dhabta ah iyo qaabka aan u adeegsanno waa labo arrin oo aad u kala fog. Qofku waa isbeddeli kartaa aragtidiisa siyaasiga ah oo wuxuu ku biiri karaa qolo kale oo ay feker ahaan iskasoo horjeedeen. Sidoo kale dowladaha ayaa marna xiriirkooda wanaajiya marna uu xumaadaa maaddaama ay isbeddeli karaan masaaliixda ka dhaxaysa siyaasad ahaan ama dhaqaale ahaan. Hase yeeshee, waa ay adagtahay in si fudud looga tanaasulo mabaadii'da leh saamayn qaran, waddan ama bulsho. Balse si taas ka duwan markaa fiiriso dhinaca Soomaalida, maba laha ahmiyad iyo shuruudo ay wataan oo u kala saaran intooda badan. Haddaan tusaale ahaan usoo qaadanno siyaasiyiin badan oo kasoo jeedda gobollada waqooyi iyo waqooyi bari ee Soomaaliya, waxaad arkaysaa jaah-wareer siyaasadeed iyo faham xumo dad badan ka haysata arrimaha siyaasadda iyo kala saarid la'aan waxa ay tahay inay ka

tanaasulaan iyo kuwa ay tahay in ay ku fara-adaygaan. Tan waxaan ula jeedaa siyaasiyiin badan oo u dhashay gobolladan aan kor kusoo sheegnay, markay joogaan gobollada waqooyi ee Soomaalilaan loo yaqaan waxay xoogga saaraan duminta iyo dhaleecaynta qaranimada Soomaaliya, laakiin haddii ay Xamar tagaan, dhibtii mid lamid ah ayey kula kacaan maammulkii iyo dadkii ay shalay beenta u sheegayeen oo lahaayeen Soomaalilaan waa dowlad madax banaan. Mana ahan arrin ku kooban gobollada waqooyi oo keliya, balse xataa siyaasiyiin badan oo kasoo jeeda dhanka gobollada Sool iyo Sanaag ayaa arrinkaan aad ugusoo caan baxay. Kuwaas oo marna magaca Soomaaliya iyo mid isirba xilal kaga raadsada maammulka Puntland marna si taas la mid ah xilal kaga doonta maammulka Soomaalilaan oo isagu u ololeeya kala goynta Soomaaliya iyo madax-banaanida Soomaalilaan. Si taas la jaad ah siyaasiyiinta kasoo jeedda gobollada kale ee Puntland ayaa markay Puntland joogaan si wayn u dhaliila siyaasiyiinta markaa xilka haya ee Xamar joogga, kuna eedeeya inay dadka degaannadaas ku nool gacan bidixaynayaan laakiin waxay jallaafooyin xun u geystaan shacabka reer Puntland markii ay xilal ka helaan dowladda dhexe iyagoo u dhaqma si lid ku ah sidii hore ee ay u dhaqmi jireen marka laga reebo Madaxweyne Cadde Muse Xirsi oo isagu taageerro mugwayn siiyey Cabdullahi Yuusuf, taas oo sabab u ahayd in Madaxweyne Soomaaliyeed gaaro xarunta Villa Soomaaliya muddo ku dhow rubuc qarni.

Haddaba, aan isweyddiinno sababta siyaasiyiinta Soomaaliyeed ay siyaasaddoodu u dhaafi la'dahay maalinba meesha ay dantooda gaarka ah ka helaan, iyagoo aan cid kale wax dan ah u hayn luggooyo iyo hor istaag maahee. Haddii qofkii shalay diiddanaa qarannimada Soomaalida ama mid ay qolyo kale isku raaceen uu maanta rabo inuu inoo sheego wax ka duwan wixii shalay isagoo aan wax cudurdaar ah ka bixin tii hore, innaguna aan maalin-ba dhageysanno waxa uu inoo sheego! Sow ma nihin habqan iyo kuwo aan jiho lahayn? Nabi Maxamed (SCW) ayaa innoo sheegay inaan qofka muslimka ah hal god labo jeer laga wada qaniinin sow maaha?. Muxuuse kaga duwan yahay masuulkii xil u dhiiba qof shalay diiddanaa wadajirka, jiritaanka iyo qarannimadda Soomaaliyeed, isagoo aan wax cududaar ah ka bixin? Yaa dammaanad qaadaya kolkii xilkaan laga wareejo in uusan shaar kale ku raadsanayn shaqo?

## *Cutubka 4aad*: Ku Tiirsanaanta Gargaarka ee Dadka Soomaaliyeed

Waxaa jira doodo badan oo iska hor imaanaya markii laga hadlayo faa'iidooyinka iyo dhibaatada gargaarka ama caawimaadda banu'aadannimo ee adduunka guud ahaan iyo Afrika gaar ahaan. Mid ka mid ah doodahaas waxay ka dhalatay buug ay qortay gabar kasoo jeeda dalka Zambia oo la yiraahdo Dambisa Moyo. Buuggaas waxay ugu magac dartay Gargaarkii Dhimashadda (Dead Aid). Waxayna aad ugu durtay gaargaarka la siiyo Afrika iyo ujeeddooyinka laga leeyahay. Waxay isweyddiisay kan badan dheefaha laga helo iyo dhibaatooyinka uu abuuro gargaarka laftiisu iyo fahamyarida dadyowga Afrika iyo madaxdooda. Dambisa Moyo waxay ahayd gabar ku takhasustay arrimaha dhaqaalaha, waxna ku baratay dalalka reer galbeedka, gaar ahaan waxay shahaadada ugu sarraysa (Ph.D) ku diyaarisey Jaamacadda caanka ah ee Oxford University, sidoo kalena waxay in badan ka shaqayneysay Baanka Adduunka qaybtiisa qaabbilsan Afrika. Moyo waxay buuggeeda ku sheegtay in gargaarka Afrika la siiyaa uu yahay mid leh ujeeddooyin ka duwan caawimaad, uuna aad ugasii daray xaaladda liidata ee fakhriga, maammul xumida, colaadaha iyo masiibooyinka kale ee daashaday qaaradda Afrika. Waxayna ku talisay in laga dhexsaaro ujeeddooyinka qarsoon ama gebi ahaanba laga daayo Afrika. Waxay soo

bandhigtay caddaymo badan oo khuseeya sii dabo-dheeraanshaha masuqmaasuqa, xanuunada, gaajada iyo ku tiirsanaanta gargaarka ee Afrika gaar ahaan waxay tusaale hoose usoo qaadatay waddamada ka hooseeya saxaraha ee Afrika.

Haddaba, haddii aad joogto waddanka Soomaaliya aadna si fiican ula socoto xaaladaha dhabta ah ee ka jira, shaki kuma jiro inaad dareemayso saamaynta xun iyo sida bulshada Soomaaliyeed ula qabsadeen caawimaadaha yaryar ee aan ka helno dibadda. Arrinkaani ma aha keliya mid ku cusub Soomaaliya, balse waa feker ka mid ah waxyaalaha loo aaneeyo inay hoos u dhigeen guud ahaan qaaradda Afrika oo ay Soomaaliya ku taal. Sidaan kor ku xusnay waxaa laga qoray qormooyin iyo buugaag faro badan kuwaas oo dhaliyey doodo badan. Qoraalladaas iyo doodahaas intooda badan waxay isku raacsan yihiin in haddii bulshadu la qabsato caawimaad ay hoy u noqonayso maammul xumo, taas oo keenaysa shaqo la'aan, faqri, musuqmaasuq, dhaqaale-xumo iyo mustaqbalka dambe oo liita.

Haddaan ku laabanno waxyaabaha liita ee aan ka baranay gargaarka la siiyo Soomaalida burburkii kadib, waxaa ka mid ah inaan qofku shaqaysan isagoo leh awooddii, helina kara shaqo nooca ay doonta ha ahaatee. Tusaale ahaan, anigu waxaan inbadan qayb ka ahaa arrimaha binu'aadannimadda iyo kuwo horumarineed ee dalka. Waxaan xilliyo badan usoo joogay rag ku

jira tiradii 30aad, oo aan rabin inuu shaqeeyo ama uu si fiican u dhaqaalaysto xoolihiisa laakiinse, shaqada kaga kalsoon in uu helo kaar cayreed oo uusanba fahamsanayn sida uu kusoo gaaray iyo cidda loogu talo galay toonna. Soomaalida intooda badan (65%, UNICEF, 2017), waxaa la aamminsan yahay inay yihiin reer miyi u badan xoolo raacato aan qorshe dhaamin xoolaha ay haystaan maaddaama aysan lahayn wax qorsheyaal quman ah oo ay ku maareeyaan xoolahaas Alle siiyey. Waxaad ba moodaa in ayba xooluhu leeyihiin maammulka guud, taasna waa ujeeddada aan u adeegsaday erayga *Xoola Raacato*; waayo waxay aad ugu baraaraan xoolaha markii ay joogaan xilliyada barwaaqada ah, balse wakhti yar ka dib markii ay abaari timaaddo, iyaga iyo xooluha labaduba waxay u baahdaan caawimaad ka baxsan awooddooda. Kama ay fekeraan xoolaha inay maammul iyo qorshe wanaagsan u samaystaan inta ay leeyihiin tabarta, laakiin waxay cataabaan markii ay tabar gabaan, xoolahooduna harraad iyo gaajo u le'daan. Waa markii ay Soomaalidu ka maahmaahday: *"Talo waa mar aad garan weydo iyo mar aad gaari weydo".*

Marwo Moyo waxay soo jeedisay qodobbo ay aamminsan tahay in lagu beddeli karo qaabka hadda Afrika loola macaamilo. Qodobbadaas ay soo jeedisay waxaa ka mid ah kuwaan:-

1. Dowladaha Afrika in ay raacaan sida ay u shaqeeyaan suuqyadda soo koraaya ee Aasiya iyagoo galaangal u yeelanaya suuqyada caalamiga ee wax kala iibsiga.

2. Inay dhiirrigeliyaan siyaasadda maalgashiga Shiinaha oo ah mid furfuran, shuruudo yar, diyaarna u ah inay hanti badan Afrika ku maalgashato.

3. Afrika in ay xoojiso suuqgeynta iyo ka ganacsiga waxyaalaha qaaradda gudaheeda lagasoo saaro, iyo

4. In sidoo kale la dhiirrigeliyo hay'adaha iyo bangiyada maaliyadeed ee Afrika laga leeyahay, si ay u sameeyaan maalgelinno iyo dhiirrigelin.

Waxaa xusid mudan in wakhtigii ay gabadhaasi buugga qortay, fekerkii dalka Shiinaha laga haystay hadda ay wax badan iska beddeleen maaddaama hadda ay jiraan fekrado badan oo dhaliilaya habka maalgashi ee dalka Shiinaha ee Qaaradda Afrika. Dhaliilahaasi waxay ku durayaan maalgelinta Shiinaha dhowr arrimood oo ay ka midyihiin; 1) in dalka Shiinuhu si dadban uga faa'iidaysanayo khayraadkii Afrika, iyadoo dadkii u dhashay baahan yihiin maaddaama shirkadaha Shiinaha ee maalgelinta sameeyaa ay shuruudahooda ka midyihiin inay shaqaalaha kala yimaadaan dalkoodii, oo aysan oggolayn in ay shaqo siiyaan muwaadinniinta Afrikaanka ah ee dalalkooda laga shaqaynayo,

taas oo sii kordhisay shaqo la'aanta ba'an ee ka jirta waddamo badan oo Shiinuhu maalgashaday; 2) in maalgelinta Shiinaha ay xambaarsan tahay daymo fara badan oo aysan dalalka Afrikaanka ahi is ka bixin karin taas oo waddamo badan ku khasabtay inay ilihii dhaqaalaha ku wareejiyaan Shiinaha si ay isaga gudaan daymihii lagu yeeshay. Tusaale ahaan, waxaa jira waddamo badan Shiinuhu kala wareegay dekadihii iyo garoomadii diyaaradaha ka dib markii uu dayn badan ku yeeshay.

Haddaan si kale u dhigno, badanaaa lacagaha gargaarka loo bixiyaa waxay maraan gacmaha dowladaha; kuwaas oo aan u bixin sidii loogu talagalay. Sidoo kale waxay abuurtaa fursado badan oo musuqmaasuq iyo wax isdabomarin oo ay ku kacaan dowladihii lacagtaas loo asteeyey. Halka dowladaha bixiyeyna ay ka fiirsadaan oo keliya in shuruudahoodii ay fuleen, kuwaas oo u badan galaangan dhanka bulshada ah sida ilaalinta xuquuqda aadanaha. Waddamada tabarta daran ee kasoo kabanaaya colaadaha sida Soomaaliya oo kale ee markaas u nugul inay fuliyaan shuruudaha lagu xiro, saamaynaha xun xun ee ay ku reebto waxaa ka mid ah in la siiyo lacago badan oo deeq ama deyn ah. Lacagtaas ayaa lagu kharash gareeyaa hay'adaha dowladahaas sida mushaharka ciidamada iyo shaqaalaha, kuwaas oo ay adagtahay inay bixiyaan dowladuhu ka dib markii lacagahaasi istaagaan maaddaama ayan lahayn awoodda intaas le'eg. Shaqaalihii lacagahaas horay u qaadan jiray ayaa

badankood aamminsanyihiin inay yihiin kuwo meelo kale ku xiran; sidaas darteed, haddii lacagtaas la waayo na ay adagtahay in la daboolo baahidoodii. Waxaan rabaa in aan arrinkaan usoo qaato labo tusaale oo kala duwan, kuwaas oo daaran ciidanka iyo shaqaalaha dowladda Soomaaliya.

**Kan kowaad** waxaan ku eegi doonaa dhaqaalaha ay dalal badan oo ka mid ah kuwo aan u naqaan saaxiibbada iyo deeq bixiyaasha Soomaaliya ay siiyaan dowladdeenna. Sida aan la wada socono, waxaa jiray ciidan ay dowladda Isutagga Imaaraadka Carabtu ay siiso lacago mushahar ah iyo adeegyo farsamo oo badan kuwaas oo jooga meelo badan oo waddanka Soomaaliya ka mid ah. Laakiinmse waxay ciidamadaas dhibaato weyni lasoo deristay markii uu soo ifbaxay khilaafkii u dhexeeyey dowladda Soomaaliya iyo dowladda Isutagga Imaaraadka Carabta, bilowgii sanadkaan 2018. Khilaafkaa ayaa la sheegay inuu in badan soo jiitamayey balse ay markaas soo dedejisay heshiiskii bishii Maarso, 2018 ku dhexmaray magaaladda Abu Dabai Ethiopia, Shirkadda DP World iyo maammulka iskood madaxbanaannida ugu dhawaaqay ee Soomaalilaan. Soo ifbixiddii khilaafaadkaasi wuxuu keenay in dowladda Isutagga Imaaraadka Carabtu joojiso wixii taageero lacageed iyo farsamo ee ay siin jirtay ciidanka ay tababartay, ee ay gacantana ku haysay iyo dowladda Soomaaliya guud ahaanba. Waxayna magaalada Xamar ka baxeen dhammaadkii bishii Abriil, 2018, laakiin dhowr beri ka dib waxaa

jiray dagaal ku dhexmaray Xamar  Ciidankii uu tababaray Imaaraadka iyo ciidan kale oo daacad u ahaa dowladda Soomaaliya, waxaana markii dambe Ciidankii dowladda daacadda u ahaa u suurtowday inay xoog kula wareegaan xeradii ciidanka ay Imaaraadku ku tababari jireen.

Waxaase layaab lahayd, markii hay'ado warbaahineed oo ka mid ah kuwa ugu sumcadda iyo xog hufnaanta badan ay soo tebiyeen sawirro laga qaaday hubkii iyo saanadihii kale ee Imaaraadka Carabtu siiyey ciidankii ay horay u tababareen oo lagu iibinayo suuqyadda magaalada caasimadda ah ee Xamar.  Arrinkaan ayaa ah mid weji gabax ku ah dowladda Soomaaliya awooddeeda ay ku hanan karto ciidamada loo tababaray, iyo sida ay mudo ku siman dhowr cisho u maarayn weyday baahida ciiddankaas oo warar aan la hubin ay sheegayaan in ciidanka ay waayeen adeegyadii asaasiga ahaa maaddaama aan dowladdu si fiican ugasii fekerin maarayntooda. Waxaa marna aan la iska indho-tiri karin ayaa ah in dowladda Soomaaliya ayan sinnaba u bixin karin waqtigaas mushaharkii iyo adeegyadii kale ee ciidankaas heli jireen kuwaas oo ahaa kuwo aad uga sarreeya awooda dowladda Soomaaliya ee xilligaan jirta; maaddaama musharka ciidankaasi qaadan jirey uu ahaa mid aad uga sarreeya kan ay qaataan ciidanka dowladdu ay mushaharka siiso. Tanina waa mid ka mid ah isku halaynta taageero dhaqaale oo aadan ogayn inta ay sii soconayso.

**Kan labaad** ayaan rabaa in aan ku iftiimiyo taageero kale oo maaliyadeed taas oo ay dowladda Soomaaliya iyo dowladaha xubnaha ka ahi ka helaan mashruuca uu hormuudka ka yahay Baanka Adduunka, kaasoo la siiyo dowladda Soomaaliya hanti lacageed iyo taageero kale oo aad u farabadan. Taageeradaas ayaa isugu jirta mushahar shaqaale, lataliyaal iyo mid farsamo; sida tababaro shaqaale iyo kabidda kharashaadyada kale ee dowlada. Mashruucaan ayaa leh saamayno liita oo ay ka mid tahay in aan shaqaalaha mashruucaas lagu qaadan si hufan oo daahfuran; inkastoo la marsiiyo tallaabooyin ka mid ah hababka shaqaalaysiinta, sida xayeysiinta iyo qaadista imtixaanno. Intaas marka lagasoo tago, saamaynta ugu xun ee aan aamminsanahay inuu reebi doono mashruucaas ayaa ah, in markii uu dhamaado ayan shaqaalaas baahidooda dabooli karin dowladda Soomaaliya. Maaddaama ay qaataan mushahar ka sarreeya kan dowladdu bixiso. Taas ayaa keeni doonta in shaqaalaha la geliyey kharashka badan sida tababarada iyo mushaharka badan ay ka tegi doonaan xafiisyada dowladeed ee ay ka shaqeeyaan, kadib markii uu istaago mashruucu. Waxaad mooddaa in ay faa'iidada ugu badan heli doonaan tiro kooban oo ah madaxda qaybaha kala duwan ee mashruucaas iyo lataliyaal farsamo ah, kuwaas oo u badan qurbajoog waddanka usoo shaqo tagey, kadib markii saaxiibbadood fariisteen xafiisyadda dalka looga arrimiyo.

Raadadka macaawinada soo gasha dalka Soomaaliya ayaa saamayno badan oo kala duwan ku yeeshay waddanka guud ahaan. Waxaan hadda kahor la kulmay arrin iga yaabisay mar aan ka dhoofayey Gegiga Caalmamiga ah ee Diyaaradaha ee Aadan Cabdulle Cismaan ee ku yaal Xamar, magaaladda madaxda dalka Soomaaliya, gaar ahaan qaybta safarrada gudaha. Waxaa indhahaygu qabteen tilmaamo ku qornaa Afka Ingiriiska oo, aan wax Af-Soomaali ahi la socon. Tilmaamahaas waxaa ka mid ahaa International Flights oo la micne ah (Duulimaadyada Caalamiga ah), Domestic Flights oo iyana la mid ah (Duulimaadyada Gudaha) iyo wax la mid ah; sida Cargo oo aysan jirin wax af-soomaali ah oo wehesha. Waxaa si fudud maskaxdayda ugu soo dhacday su'aal ahayd sababta afkeennii meesha uga maqanyahay iyo tiro intee le'eg oo Soomaali ah ayaa fahmikarta afka Ingiriiska?. Waxaan xasuustay in, in ka badan 70% dadka Soomaaliyeed ahaayeen kuwo aan waxna qorin, waxna akhrin. Su'aal ayaan si deggan u wayddiiyey mid ka mid shaqaalaha hubinayey dadka gudaha hoolka gelaya, taas oo ahayd *"Maxaa Garoonka Af-soomaali loogu qori waayey"*? Nasiibdarro, jawaabtii uu i siiyey ma ahayn middii aan filaayey.

Wuxuu iigu jawaabay: *"Garoonkaan waxaa iska leh Turki ee ninyahow iska soco, su'aalaha iska dhaafoo"*. Qofka shaqaalaha ah ee aan su'aasha wayddiiyey, waxaan filayaa in uusan lahayn door saa u wayn, balse waxaan aan aad ula yaabay ayaa ahaa sida

shaqaalaha ka shaqeeya mid ka mid ah xarumaha ugu adeegga badan dalka looga ilaaway afkeennii Soomaaliga iyo weliba hanyarida iyo maangaabnida qaar ka mid ah shaqaalaha gegidaas waddanka wejiga u ah ka shaqeeya!. Tani waa mid ka mid ah saamaynaha ugu yar ee gargaarku ina dhaxalsiiyey.

## *Cutubka 5aad:* Saamaynaha Gaarka ah ee Qurbajoogta Soomaaliyeed

Sida in badan oo inaga mid ahi aamminsan tahay, qurbajoogtu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah bulshada Soomaaliyeed. Taasi waa sax markii loo eego sida ay u kaalmeeyaan dad badan oo ehelkooda ah, kuwaas oo dalka jooga, hase ahaatee anigu waxaan qabaa in waxyeelladoodu ka badantahay waxtarkooda, waxaana isku deyayaa in aan ku fahamsiiyo sababta aan sidaas u aamminsanahay. Qurbajoogtu waxay daljoogta kaga xun yihiin qabyaaladda. Waxaad arrinkaan oggaanaysaa markaad dhab u fiirsato sida ay ugu kala qaybsan yihiin meelaha ay ku noolyihiin. Waa kuwa ugu badan ee ka qaybqaata dhibaatooyinka dalka ka jira maaddaama ay maalgeliyaan colaadaha iyo dagaallada beelaha dhexmara, dhiirrigeliyaan kala qaybsanaanta iyo sedbursiga bulshada dhexdeeda ah; maalgeliyaan shaqsiyaad aan lahayn tayo, aqoon iyo siyaasad toonna kuwaa oo waddanka u yimaada siday u qaban lahaayeen xilal sarsare. Inta badan, dadka xilka u soo raadsada Soomaaliya sidaan horay u sheegnay waxay reerahoodu deggan yihiin meelo ka baxsan Soomaaliya, si ay carruurtooda uga badbaadiyaan dhibaatooyinka dalka ka jira, waxbarasho fiican ugu helaan, mustaqbal fiicanna ugu diyaariyaan; halka ay dhacayaan hantida kuwa tabaalaysan ee aanan awoodin inay meelo kale u guuraan. Tani waa markii

suugaanyahankii ee Reer Masar, ee Ahmed Fouad Negm uu lahaa *"Waxay waxbarashada u aadaan waddanka dibaddiisa, markay xanuunsadaan waxay caafimaad u aadaan waddanka dibaddiisa, dalxiiska waxay u aadaan waddanka dibaddiisa, reerahoodu waxay deganyihiin waddanka dibaddiisa, waxa keliya ee ay waddanka gudihiisa ku sameeyaan waa inay wax xadaan*".

Sidoo kale, intooda badan, ma laha khibrado u dhigma jagooyinkaas sarsare ee ay raadinayaan; maaddaama ay shaqadoodu u badan tahay fadhi ku dirir, xamaali iyo dareewalnimo taas oo aan la jaad ahayn xilalka ay waddanka kasoo raadsadaan. Waxaanba anigu aamminsanahay qurbajoogta dalka xilka usoo doonta intooda badan inay yihiin dad nolosha ka dhacay oo qurbaha ku wareeray, lana qabsan waayey sida looga noolyahay dalalka ay tageen. Tan waxa caddayn u ah sheeko uu hadda ka hor iiga sheekeeyey nin aan saaxiibbo nahay. Sheekadaas oo ku saabsanayd hooyo ay ehel yihiin oo dalka in badan ka maqnayd, ka dibna xilli dhaweyd timi, si ay bal waddankii iyo xaalkiisa u indha-indhayso. Laakiin xafiisyo badan oo ay booqatay waxay aragtay arrin ka yaabisay, taas oo ahayd dad badan oo qurbaha markii ay joogeen shaqadoodu ahayd inay dadka soo dhaweeyaan balse hadda xafiisyo badan madax ka ah oo agaasimeyaal guudna ku jiraan. Wuxuu yiri hooyadii su'aal ayey i wayddiisay oo waxay tiri: *"Dalka ma laga waayey wax dadkaan dhaama?"* Tayo xumadaas aan soo sheegnay waxaa usii

dheer fikradaha ay xambaarsan yihiin iyo meelaha ay ku xiranyihiin oo in badan oo ka mid ahi ayanba isfahmi karin, sababtuna waa iyagoo intooda badani waddamo kala duwan xirriiro la leeyihiin kuwaa oo ay wax ku barteen, deggan yihiin ama dhalasho ka haystaan.

Sida ay ogyihiin qaybo badan oo inaga mid ahi, dalal badan oo dunida ahi kuma aamminaan meelaha muhiimka ah dadka leh dhalashooyinka shisheeye maddaama ay aamminsan yihiin inay dhici karto dano iska soo horjeeda inay meesha soo galaan (Conflict of Interest). Tan waxaan ula jeedaa waxaa iska hor imaanaya danaha labadii dowladood ee qofkaasi dhalashadda ka wada haystay, ka dibna waxaa dhicikarta in uu dhalashadiisa dambe u baqo oo uu halkaas ku dayaco dantii wadankiisa kowaad. Sidoo kale, haddii dadku ay wax ku bartaan waddamo kala duwan, sidoo kale na ay leeyihiin dhalashooyin kala geddisan, ayna xambaarsan yihiin dhaqanno aan isla jaanqaadi-karin, waxaa marag ma doonto ah inay imaannayso shaqa xumo iyo isfahanwaa. Shaqa xumada iyo isfahanwaagu waxay ka imaanayaan kala duwanaanshaha qaabka waxbarasho iyo dhaqan ee ay kala aamminsan yihiin dadka wada shaqaynayaa. Tusaale ahaan, Dalka Afgaanistaan (Aghanistan) oo ku yaal qaaradda Aasiya (Asia) ayaa waxaa qabsaday kooxihii la dagaalamayey Ururkii Taalibaan (Taliban), dalalka waddankaas ka dagaallamay ka dibna xoogga ku qabtay ayaa ka koobnaa  inta baban xubnaha

Isbahaysiga NATO oo ka kala yimid ugu yaraan saddex qaaradood oo dunida ah, waddan walbaa wuxuu tababaray ciidan ka mid ah ciidamadii dalkaas, asii hurgumada ka timid ayaa ahayd in waddan walbaa [uu] baray qaabkii ay ciidankooda u tababaran jireen; markaas ayaa koox walbaa ay noqotay in ay salaanta ay dhinac gaar ah ka qaadato. Waxaan ula jeedaa hadda qof walbaa wuxuu rabaa in uu dalka ku dabakho fikradihii waxbarasho ee uu kasoo qaatay waddankii uu wax ku bartay ama ku dhashayba taasna maaha mid xal midaysan keenaysa.

Sidaa darteed waxaa loo baahanayaa in la helo meel dhexe oo laysugu yimaado. Taas oo noqon karta inay jiraan shuruuc, siyaasado, qorshayaal iyo nadaam degsan oo ay ku khasban tahay qolo walbaa inay raacdo; balse markii lajoogo dal sida Soomaaliya oo kale ah kaas oo dhinac walba ka burburay una baahan in dhammaan hay'adihii dowladda in dib loo yagleelo, aysana jirin ka go'naansho dhab ah ee masuuliyiinta talada haysa, waxaad dareemaysaa dhibaatada iyo jaahwareerka ay leedahay kala duwanaanshuhu, si kasta oo ay u leeyihiin aqoon iyo khibrad shaqo. Markii xaaladdaan oo kale dhacdo waxaa fiican in dadka markaas talada hayaa ay samaystaan hab wada shaqayneed oo ay isku fahmi karaan. Habkaasi waa in uu yahay mid khasab ku ah masuul kasta oo dowladdaas ku jira, si loo gaaro isfahan guud iyo wadashaqyn dhab ah. Habkaasi wuxuu noqon karaa mid qoran oo tababar lagu siiyo qof walba oo dowladda ku jira, si loo kala saaro

fahamka, aqoonta iyo waayo-aragnimada gaar ahaaneed ee qofkaas iyo tan guud ee dalka hormarkiisa iyo badqabkiisu ku jiro. Marna lagama fili karo inay dal horumariyaan dad ay adagtahay inay iyagu isfahmaan, waxaana aamminsanahay arrinkaani inuu yahay mid ka mid ah waxyaabaha ragaadiyey dowladnimadda Soomaalida ee beryahaan dambe noqotay mid uun taariikh nololeedka lagu darsado kasoo shaqaynteeda.

## *Cutubka 6aad:* Isbeddelka Soomaalida ku dhacay Dhanka dhaqanka iyo Afka

Soomaalida waxaa la xusaa inay tahay dad reer guuraa ah oo ilbaxnimada iyo magaaladu ku ahayd xilli dhow, welina ay intooda badni tahay reer miyi (65%, UNICEF, 2017). Si taas lamid ah waxay Soomaalidu lahaan jirtay dhaqammo fiican oo intooda badan ah kuwo diinteenna islaanku ina farayso sida in la iskaalmeeyo, in maatada ay ka mid ka yihiin dumarka, caruurta iyo dadka waaweyn aan la waxyeellayn xataa haddii ay jirto colaad markaaas ka dhex jirta. Waxaa jiray dhaqan adag oo ay dumarkeennu lahaayeen. Waxaa adkayd in gabadha Soomaaliyeed la arko iyada oo wax cunaysa ama meel fagaare ah ka sheekaynaysa xishood iyo dhaqan wanaag darteed, iskaba daa in la arko qayb jirkeeda ka mid ah. Laakiin si taas ka duwan, hadda waxaad arkaysaa in in badan oo ka mid ah dumarkii Soomaaliyeed ay ka tageen dhaqankii wanaagsanaa ee ay lahaan jireen. Lama dafiri karo in isbeddelka bulsho ee aan la wadaagno adduunka kale iyo harumarrada aan gaarnay ee ilbaxnimo ay yihiin kuwo leh saamayntooda xun iyo fiican labadaba; balse anigu waxaan xoogga saarayaa qorshayaasha qof ahaaneed iyo wadciga markaas taagan inaan kala saarno. Tusaale ahaan, haddii gabadha Soomaaliyeed ay markay waddanka joogto tahay qof asturan, edab leh, ayna yar tahay inaad aragto iyadoo wadata dhar

aan ku haboonayn dhaqankeeda iyo diinteeda, balse markii waddan deris ah ama mid fogba tagto ay intaasba illowdo, waxay ina tusaysaa in aynu nahay habqan aan lahayn wax qorshe ah laakiinse dabayshaa hadba dhinac u raacaya, taasina waa mid kamid ah sababaha aan buuggaan u qoray si aan bulshada Soomaaliyeed ugu baraarujiyo muhiimmadda qofku in uu leeyahay qorshayaal isbedbedeli kara iyo kuwo ay adagtahay inay isu-beddelaan si fudud.

Waxaa jira waxyaabo badan oo dhaqanka waddankaas ku xiran, oo haddii la waayo dhaqankii ay hubaal tahay in iyagana la weynayo. Waxyaalahaas waxaa ka mid ah Afka ay dadka dalkaas deggani ku hadlaaan oo muhiim u ah jiritaankooda. Xilligaanna waxaa jira degniino ay soo jeedinayaan khuburo Soomaaliyeed oo ah in Afkii Soomaaliga khatar ku jiro hadaan si dhow wax looga qaban maaddaama uu yaraaday adeegsigiisa. Waxyaabaha loo aanaynayo yaraanshaha adeegsiga Afka Soomaaliga waxaa qayb ka ah awood yarida hay'adaha dowliga ah ee dalka iyo barnaamijyada gargaarka, maaddaama dadka ka shaqaynaya hay'adaha Caalamiga ah badanaa shuruud looga dhigo aqoonta Afafka qalaad taas oo qayb ka ah saamaynaha xunxun ee ay leedahay macaawinada dalka soo gasha oo ah mid aan cidna si toos ah u xukumin. Mararka qaar markii aan la doodayno dad inaga duwan dhaqan ahaan iyo diin ahaan-ba waxaa ila habboon inaan ku faanno dhaqankeenna, diinteenna iyo afkeenna sidii ay

samayn jireen awoowayaasheen. Haddii Xirsi Magan (AHU) uu 1960-kii diiday in uu Afka Ingiriiska ku yiraahdo subax wanaagsan (Good morning), uuna doortay in uu Afkiisa hooyo ee Soomaaliga uu ku faano, maxaa Af Ingiriis ka dhigay Reer Magaalnimo iyo aqoon 2018?

Safarro badan oo aan galay, waxaan dareemay inuu jiro dagaal u dhexeeya dhaqamadda kala duwan ee dadyowgu leeyihiin. Sidoo kale, waxaan garwaaqsaday inay jiraan waxyaabo aan wadaagno dalal badan dhaqan ahaan, marka diinta laga tago. Waxaan xasuustaa maalin ay noo yimaadeen labo gabdhood oo reer Holland ah. Meeshu waa magaaladda dekadda ah, ee Rotterdam ee dalka Holland. Waxay noo sharraxayeen eray markaas aniga igu cusbaa oo aanan maqal maalintaas ka hor, inkastoo aan in badan arrimaha bulshada ee Soomaaliya kusoo dhexjiray. Eraygaasi wuxuu Afka Ingiriishka ku ahaa (Emancipation) oo Soomaali ahaan la micne ah (Xoraynta Dumarka). Waxay waqti badan ku qaateen gabdhahaasi inay nooga sheekeeyaan dhaqankooda iyo sida ay xad u kala leeyihiin iyaga iyo raggoodu, iyo inay yihiin dumar xor ah. Nin Oday ah oo u dhashay dalka Kenya ayaa yiri: *“Xaaskaygu aniga waa ay iga aqoon badan tahay, waxaan kuwada joognaa talo iyo wanaag, kamana suurtowdo intay dad hortimaaddo in ay ka sheekayso xaalkeena gaar ahaaneed iyo sida aan u noolnahay qoys ahaan”.*

Doodda oo dheeraatay ayaan gabdhihii ku iri: *“Dhaqan ahaan iyo diin ahaan toonna arrintaani annaga nama khusayso”* waxaana u sheegay in guurkeennu ku dhisan yahay qoys; qoysna ayan labo qof madax u wada noqon karin. Waxaa cajiib ahayd inay iga dhinac hadashay gabar ka timi wadan Afrikaan ah taasoo sheegtay inaan diinta been ka sheegayo, maaddaama aan hadalkayga raaciyey *diintayaddu dumarka xornimo ma siin.* Gabadhaas ayaa ahayd mid madax banaan (Madax qaawan), isla markaana aanan aqoon erayga “Salaad” waxa Afka Carabiga lagu yiraahdo, inkastoo ay noo sheegtay inay tahay qof Muslim ah kana soo jeedda qoys diimeed oo aad loo xurmeeyo. Sidoo kale, waxaan bartay in dadka ku abtirsada diinta Islaamka ay ugu ad-adag yihiin dadka u dhashay waddanka Baakistaan (Pakistan) oo ka mid ah waddamada ugu waaweyn qaarada Aasiya, oo ay adagtahay inay si fudud isku bedbeddelaan.

## *Cutubka 7aad:* Fahanka Dowladnimo ee Soomaalida

Haddaan dib u milicsanno waayihii ay dadka Soomaaliyeed soo mareen, waxaad dareemaysaa inay jirtay qorshe xumo baahsan, qabiilaysi iyo kala qaybsanaaan. Taas waxaa daliil u ah sida abwaanno badan oo Soomaaliyeed ay u cabbireen dareenkooda kadib markii ay Soomaaliya xornimada qaadatay. Abwaannadaasi waxay intooda badan isku raacsanaayeen inay ku hungoobeen dowladnimadii ay filaayeen oo halganka badan loosoo maray, laguna waayey halyeeyo badan oo Soomaaliyeed; iyo in gumeystayaashii caddaanka ahaa tageen, balse ay ka tageen kuwo Soomaali ah oo leh dhaqankoodii, intooda badanna ku shaqaynaya qorshayaashii gumaystaha. Si taas la jaad ah, waxaad dareemaysaa dadka yar ee isku daya inay wax ka beddelaan habkaas gumaystaha laga dhaxlay ee aan kor kusoo sheegnay inay markasta ay ahaayeen dhibbanayaal laga horkeeno dadka intiisa kale si loo ragaadiyo qorshayaashoodda iyo hankooda waddanninimo.

Markaad si fiican u dhuuxdo suugaan badan oo ay tiriyeen abwaannadii xilligaas joogay, waxaad arkaysaa sawir u dhow kan maanta Soomaaliya joogto adiga oo shaki gelinaya inay ka hadlayeen xilligii ay joogeen ee lixdanaadkii (1960s) iyo in ayba hadda ka hadlayaan, maaddaama suugaantoodu ay bixinayso

tusaaleyaal u eg kuwa maanta aan indhaheenna ku arkayno. Suugaanyahannadaas waxaa ka mid ahaa Cismaan Yuusuf Keenadiid, Abdullahi Suldaan Timacadde, Guhaad Cabdi-Gahayr, Axmed Ismail Diiriye, Maxamed Nuur Laangadhe iyo kuwo kale oo badan. Suugaantaas qaybo ka mid ah ayaan kusoo qaatay sadarradaan hoose, si aan u cabbiro dareenkaas suugaanyahannadu ay xilligaas qabeen iyo wixii u muuqanaayey.

Axmed Ismaaciil Diiriye oo ku magac dheeraa (Qaasim) ayaa dareenkiisa ku miisaamay wixii uu filaayey iyo sida wax noqdeen, abwaanku wuxuu ka cabanayaa in aan waxba isbeddel iyo maammul ahi u muuqan marka laga reebo, dadka dubka Soomaalida uga eg ee xafiisyadii dowladda markaas fadhiyey oo aan gumeystayaashii waxba dhaamin. Wuxuuna yiri Abwaanku:-

*Waa kaa dareersaday Xamar, dayr cadkii dhalayee,*
*Dembi ku hadli maayee ma arag, dawladaan rabaye,*
*Isma doorin gaalkaan diriyo, daarta kii galaye,*
*Dusha midabka Soomaali baad, dugulka moodaaye,*
*Misna laguma diirsane, qalbigu waa dirkii Karal'e*
*Meeshaan dad aan ururshiyo, darar ka eegaynay,*
*Iyaba waa darxumo ii hadhaye, dacar miyaan leefay,*
*Ma darraato raadkaan dhigaan, dib ugu soo laabtay,*
*Sidii aan dayaysnahay, miyaan dawga ka habaabay* .

Cabdillaahi Suldaan Timacade oo ka mid ahaa halgamayaashii ka qayb qaatay xoraynta waddanka ayaa isaguna gabay ku cabbiray sida uu u saluugsan yahay habka maammulka waddanka loo weecshay iyo in aysan ahayn wixii ay filayeen. Wuxuu Abwaanku uga digayaa Soomaalidii xilligaas hoggaanka haysay in hadday saas wax ku wadaan uu waddanku xilli dhow geli doono mustaqbal xun. Wuxuuna yiri:-

*Geesiga madow uma ogola, guusha reer-Yurube*

*Geerida lamuumbaa wadnuhu, noo gig leeyahaye*

*Geyigiisa goortuu qabtee, gees isugu leexshay*

*Iga guura galabtuu yidhaa, geeddan loo xidhaye*

*Godka waxa u qoday haamarshooli, waa gedduu rabaye*

*Maantaba hadday gawraceen, way gam'ahayaane*

*Meeshuu galaba doollaarku waa, uu gembiyayaaye*

*Ninkii dunida kala gaabiyaa, garabsanaysaane*

*Raggan gacanta haystoow wallee, saad-dambaad garane*

*Qudheennani intaynaan geb odhan, yeyna kala gaadha*

*Haddii kale se goor aan fogayn, gawda bal aan eegno*

Sidoo kale Abwaan Cismaan yuusuf Keenadiid ayaa isaguna suugaan ku cabbiray sida ay wax ugu muuqdeen ka dib markii xornimada laqaatay. Wuxuu abwaanku aad u dhaliilayaa madaxdii xilligaas joogay isagoo sheegaya in haddii dad ay madaxdu ka xumaato inay xumaanayaan dhammaantood iyo mushaharka yar ee ay eexaysanayaan uu yahay mid aan micno weyn layn; se ka hor istaagaya inay xaqooda raadsadaan oo dadkooda si fiican ugu shaqeeyaan. Abwaanku waxaa suugaantiisii ka mid ahayd:

*Dadkey madaxdu ka xumaato, waa marin habaabaaye*
*Kuwa muqaddimada looga dhigay, waa manfaco raace*
*Mar maxaad cuntaa keliya, buu yahay muraadkoode*
*Nin mushaharo eexaynayaa, waa miskiin dhabahe*
*Muddeec waxa ka dhigay, waa inuu maarmiwaa-yahaye*
*Muddaacana seeg iyo, inuu maya yiraahdaaye*
*Culimadana damac baa malgoo, mooyi sey tahaye*
*Milladdiyo shareecada, bar baa maal ku iibsade*
*Marsiis iyo fudayd, buu ku dhacay maqane diinkiiye*

Haddaba aan iraahdo Soomaaliya waa dal ay ku badan yihiin inta dantooda gaarka ah jecel danta guud, waa dal ay diinta iyo shuruucda kale ee u yaal ay ka awood badan tahay danta qabiilka, waa dal inta badan dadkiisu caddaaladda iyo caddaalad darrada ayan kala aqoon. Waa dal ay dadkiisa nadaam darrada ka

jecelyihiin nadaamka iyo kala dambaynta. Waa dal aan la kala aqoon halyeyga iyo kuwo hagardaamada wada; waa dal qof walbaa ka cabanayo caddaaladdarro iyo eex. Waa dal colaad, gaajo iyo dhibaatooyin kale deris la ah isagoo leh khayraad aad u fara badan. Waa dal dadkiisu ku abtirsadaan diinta Islaanka, se dhaqankeeda ay ka arradan yihiin; waa dal dadkiisu ay wada habqan yihiin. Waa dal aan aqoontu wax qiimo ah ka lahayn, bal'e mudnaanta la siiyey eexda iyo weji garashada. Waa dal hawshii masuul ama xafiis dowladeed kaa gashaa u baahan tahay fududayn (bribe); haddii kale ay adagtahay in wax u dhacaan sidii aad rabtay.

Midkeenna masuulka ahi wuxuu jecel yahay in uu hormarsado danihiisa gaarka ah; halka kan ka hooseeyaa uu awooddiisa socdo. Madaxdeennu waxay xilka ku helaan laaluush iyo musuqmaasuq; halka oday dhaqameedkeena ayba adagtahay in aad kalsooni ka hesho haddaadan qofka kula tartamaya la dhigmin maal ahaan. Waa dal culimadii beryo xaggooda loo carari jiray hadda lagu hungoobay, waa dal markaad fiiriso aan mustaqbalka dambe cidiba u jeedin, asii qof walbaa uu rabo wixii maanta uu janto.

Haddii aan gumeystayaashii ka cabanaynay in qaybo badan oo inaga mid ahi ay garbo u ahaayeen, markii uu tageyna aynaan ka leexan waddadii uu inoo jeexay ee ahayd "Qaybi oo Xukun" balse

aynu ba la qabsannay oo dowladnimada sidaas moodnay, innagoo gacmaheenna ku burburinay dowladnimadii aan halganka badan u soo marnay. Hantideennii aan gacmaheenna ku dhacnay, dadkeennii badnay qax, gaajo iyo kala qaybsanaan; sow ma nihin dad aan waxba ka fahansanayn habka dowladnimo ee dal iyo dad lagu maammulo? Kuwa mucaaradka ahi waxay ku dhaliilaan inta talada haysa maammul-xumo, musuqmaasuq, karti yari iyo khaa'innimo wadan, hase yeeshee, markii ay hantaan xafiisyada dalka ugu sarreeya waxay u dhaqmaan sidii kuwii ay shalay ficilladooda xaaraamaynayeen. Kama xishoodaan wixii shalay la xumaa, taasina waxay muujinaysaa inay kolkii horeba ahaayeen kuwo aan wax qorshe ah lahayn ee waxqabadkoodu afka baarkiisa uun ahaa. Si ka baxsan dhaqanka wanaagsan ee siyaasadda, Soomaalidu waxay waxa xun u aragtaa intay ay dibadda ka joogto maammulka. Waxay muwaadiniin yihiin inta aysan gaarin xafiisyada go'aammada dalka laga gaaro. Taas oo inoo muujinaysa habacsanaanta, qorshe xumada iyo laab-lakaca siyaasiyiinta, dhallinyarada iyo aqoonyahannada Soomaaliyeed. Tan waxaa daliil u ah in aan, in badan aragnay siyaasi markii xilka laga qaaday ka sheekaynaya dhibaatooyinka iyo khaladaadka ka dhex jira maammulkii uu horay uga tirsanaa. Siyaasi inta uu xafiiska joogo aan wax qaddarin ah u hayn shacabkii uu metalaayey iyo qarankiisa midna, balse kolkii xilka laga qaado ama xilku ka dhammaado ina maqashiiya erayo

macmacaan iyo inuu dareemaayo khaladaadka siyaasadeed ee jira iyo dhibaatooyinka haysta bulshaweynata Soomaaliyeed, uuna xalkooda isagu hayo.

Waxaan dhageheenna ku maqalnaa markasta oo doorasho ka jirto meel Soomaaliya ka mid ah, halku-dhigyo iyo erayo yididdiilo leh oo ina rajo geliya; kuwaa oo ay adeegsanayaan siyaasiyiin xildoon ah. Halku dhigyadaas waxaa ka mid ah bedbaado iyo isbeddeldoon, laakiinse, wax badan kama hirgalaan ballanqaadyadaas tirada badan iyo rajooyinkii lagu riyooday, marka laga reebbo inay talada dalka ay la wareegaan koox isku garasho ah oo aan lahayn wax qorshe ah ee horumarineed. Koox u shaqaysa sida xisbi, haddana aanan lahayn sifo sharciyeed oo xisbinimo. Koox u badan qurbajoog aan waddanka xaalkiisa dhabta ah wax war ah aan ka hayn kuwaas oo xoogga saara samaynta ilo dhaqaale oo leh faa'iidooyin gaar ah. Koox intooda badan aad ugu fiican ku hadalka afafka dalalka loo yaqaan *'deeq bixiyaasha iyo daneeyeyaasha Soomaaliya'*, una nugul dalabyada ay ku xiraan, se aan wax badan ka fahmi karin xeer hoosaadyada waddanka iyo hab dhaqanka Soomaalida. Koox aan wax badan ka aqoon taariikhda Soomaalida, kuna faanta dalalka ay ka haystaan dhalashooyinka iyo deggenaanshaha, kuwaas oo intooda badan xambaarsan aragtiyo ka duwan kuwa dadka Soomaaliyeed u hamuun qabaan. Koox intay dalka joogaan ku socda baabuur raaxo oo qaali ah aana shacabka si fiican u dhexgelin markii uu

xilku ka dhamaadana ku laabta dalalkii ay dhalashooyinka ka haysteen, qoysaskoodii iyo shaqooyinkoodii hoose; maaddaama aysan dalalkaas ka heli karin shaqooyin u dhigma kuwa ay dalka ku haystaan, aysana in badan oo ka mid ahi lahayn aqoon u dhiganta xilalka sarsare ee ay waddanka sida fudud uga helaan, iyagoo ka faa'iidaysanaaya saaxiibtinnimada iyo asxaabtooda jooga xafiisyada dalka ugu sarreeya. Hadaba, haddaan rabno in aan kasoo kabanno dhibbaatooyinka ina haysta wakhtiga dheer waa inaan fiirinaa sida dalalkii u burburay sideenna oo kale ay usoo kabteen ? Maxay sameeyeen Reer Ruwaanda (Ruwanda)? Ma aamminsantahay in waddankaas hadda qabiilka laga necebyahay?

Dhammadkii sanadkii 2014, ayaan tababar ka wada qaybgalnay, magaalada Caruusha ee dalka Tanzania, gabar u dhalatay dalka Ruwaanda. Nin aan saaxiibbo nahay, oo aan wadda soconnay ayaa gabadhii waydiiyey su'aal, oo wuxuu yiri "Ma Hutu ayaa tahay mise Tutsi"?. Gabadhii waa ay isbeddeshay dareen ahaan waxayna fiirrisay ninkii dhinaciisa. Cabbaar ayey aamustay ka dibna waxay ugu jawaabtay " Haddaan Reer Ruwaanda nahay, waa necebnahay qofkii su'aashaas oo kale na waydiiya waayo waxaan kasoo marnay dhib badan qabiilladdaas iyo sheegashadooda". Waxay noo sheegtay inay tahay gabar reer Ruwaanda ah, waxayna saaxiibkay uga digtay in qof dambe oo Ruwaanda ka yimid uu san su'aashas waydiin oo ay tahay mid

khalad ah. Weliba waxaan aamminsanahay gabadhaasi inay nala diriri lahayd haddii aan ahaan lahayn waddammadii ka qayb qaatay xasuuqii dalkaas ka dhacay balse nasiib wanaag waxay ogayd inaan nahay Soomaali aan marna lagu eeddayn inay ku lug lahaayeen dhibtii waddankaas ka dhacday. Waxay sidoo kale noo sheegtay inay jirraan qolyo badan oo isku deyaaya inay dhibkii nasoo xasuusiyaan maaddaama ay xilliyadaas socdeen warbixino ay warbaahinta BBC-da ka diyaarisay xasuuqii dalkaas ka dhacay oo saraakiil dowladda ka tirsan ku eedeeyey inay ku lug lahaayeen xasuuqii 1994-kii dhacay.

Buugga loogu magac-daray "Maxay Qarammadu u Guul-darraystaan?" (Why Nations Fail) ee ay qoreen ACEMOGLU iyo ROBINSON, waxaad in badan oo ka mid ah ku arkaysaa waxyaalo badan oo ka mid ah kuwa ragaadiyey waddankeenna Soomaaliya iyo sababta dadkeennu u hanan la'yahay dowlad ay masuuliyiintoodu ku filan yihiin maammulka iyo hagidda wadanka. Waxay buuggooda xoogga ku saareen waxyaabaha uu waddan ku burburo ama ku horumaro; iyagoo dhinacyo badan ka miisaamaya, gaar ahaan dhanka siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada. Marnaba meesha kama ayan saarin doorka hoggaamineed oo ah waddan walbaa meesha laga hago jahada dalkaasi uu u jeensanayo iyo qorshayaasha mustabqal ee ay tahay inuu degsado. Waxaad si fudud u dareemaysaa in haddii waddanka maammulkiisu uu gacanta u galo qof ama koox aan u

saaxiib ahayn caqli iyo waddaninimo, in waddankaasi si fudud ugu dhacayo maammul-xumo, musuqmaasuq, kala qaybsanaan, fakhri iyo musiibooyin kale oo dabiici ah ama kuwo aadamigu sabab u yahay. Sidoo kale, waxaa halkaas ku burburaya bulsho weyntii dalkaas u dhashay, iyagoo u qaybsama wax u dhinta musiibooyinkaas aan kor kusoo xusnay, wax waddanka ka cararaya, qaar dhexdiisa ku dhibaataysan iyo inyar oo ka ag-dhow ciddii markaas xukunka wadankaas haysa.

Waxaa si taas la jaad ah meesha ka baxa hankii iyo firfircoonidii ku jirtay in badan oo ka mid ah dadka dalkaas u dhashay. Waxaa micna beesha aqoontii iyo hal-abuurkii dhallinyarada iyo xirfadleyaasha kale ee dhulkaas uu Alle ku beeray. Dalkaasi wuxuu u nuglaanayaa nooc kasta oo dhibaato ah, ugu dambaynna waxay waddankaas hoos geynayaan waddamo dhaqaale ahaan iyo siyaasad ahaanba ka liitay maaddaama ay waddankoodii gacmahooda ku burburiyeen. Dadaalka iyo firfircoonida dhallinyarada iyo xirfadleyaasha kale ee waddan walbaa waxay muhiim u yihiin bedqabka iyo horumarka dal iyo bulsho ee dhammaan naflaha waddankaas ku nool. Shaki kuma jiro in dedaalku yahay kan lagu gaari karo barwaaqo iyo horumar qof ahaaneed, mid bulsho iyo waddan; taas oo ah waxa qofwalba oo caqli fiyow leh uu dareemikaro.

Waxaa jiray arday seexday iyadoo xiisad lagu guda jiro, intii ardaygaasi hurday ayaa macallinkii uu ardayda u sheegay labo masalo xisaabeed oo aan laga shaqayn karin kuwaas oo uu garwaaqsaday inay buugga ku yaaliin. Sidaas dartedna uu sabuuradda ugu qoray si ayan isugu daalin ardaydu, maaddaama macallinkiiba ku wareerey oo ka shaqayn kari waayey laakiin ardaygii seexday ayaa mar dambe oo uu, soo kacay isha ku dhuftay labadii xisaabood ee macallinku uu sabuuradda ku qoray, wuxuuna u fahmay inay tahay xisaab shaqo guri ahaan laysugu diray, deetana waa uu qortay wuxuuna la aaday xaafaddiisii. Wuxuu waqti badan geliyey inuu ka shaqeeyo masalooyin xisaabeedkaas, ugu dambayna wuxuu ku guulaystay inuu mid ka mid ah ka shaqeeyo. Arrinkaan ayaa macallinkii la yaab ku noqday, markii ardaygii ula yimi masaladii si uu ugu saxo waxayna muujinaysaa sida dadaalka iyo wax iskudaygu u leeyahay faa'iidooyinka badan *(Sheekadaan waxaan kasoo xigtay buugga Astaamaha Qofka Hanka sare leh ee uu Qoray Ustaad Cabdifataax Cajab).*

## *Cutubka 8aad:* Heerka Aqoonta ee dalka Soomaaliya

Aqooonta ayaa ka mid ah waxyaaba ugu daran ee haddii ay waddan ka burburaan ay adagtahay in dalkaasi si sahlan dib isugu taago, maaddaama aqoontu ay tahay tan qofku ku dareemi karo waddada uu ku socdo. Awoodda uu qofku ku cabbiri karo dareenkiisa, xirfadaha bulshadu ku soo kaban karto iyo halbeegga guud ee horumarka waddan kasta lagu cabbiri karo. Waxaa jirtay oraah micnaheedu ahaa: *"Burburinta Waddan uma baahna hubka wax gumaada iyo gantaalaha ridada dheer toonna. Waxay u baahantahay hoos u dhigida tayada waxbarasho ee dalkaas iyo oggolaanshaha in ardaydu ku baasto qish. Intaas ka dib dadku waxay ku dhimanayaan gacmaha dhakhaatiirta, dhismayaashu waxay ku burburayaan gacmaha Injineerrada, lacagtu waxay ku lumaysaa gacmaha xisaabiyaasha, Binu'aadantinnimadu waxay ku lumaysaa gacmaha culimada diinta, caddaaladduna waxay ku lumaysaa gacmaha garsoorayaasha"* Oraahdaani uma baahna fasiraad badan, laakiinse, waxay noo sheegaysaa in waddanka waxbarashadu ka xumaato ay sahlan tahay qofku inuu sheegto darajo uusan gaarin, ayna sidoo kale fududdahay in aad ka gudubto imtixaannada jaamacadda; weliba darajo fiican, adoo adeegsanaya garasho iyo laaluush. Nin Sheekh ah ayaa maalin masaajid naga wacdiyey. Wuxuu aad ugu dheeraaday

masuuliyadda xaakinka ama garsooraha iyo sida ay u dhib badan tahay. Wuxuu saddex qaybood u kala qaybiyey dadka wax xakuma ee jooga maxkamaha, markaas ayuu sheegay in labo ka mid ahi ay naarta galeyso, oo hal mid ah, oo kali ahi ka badbaadayo!. Illaahoow naartaada naga badbaadi!. Sheekhu wuxuu ku sheegay saddexdii qaybood sidaan:-

1. Qof isagoo aan darajadii aqooneed ee xaakinnimo gaarin, xaakin sheegtay. Kaas wuxuu yiri, wixii uu xukumo sax iyo khaladba. Wuxuu ku mutaysanayaa NAAR!

2. Qof gaaray darajadii xaakinnimo laakiinse, xukunkii isagoo garanaya beddelay sababtu ha ahaato inuu maal qaatay ama in uu si kale u eexday. Wuxuuna ku mutaysanayaa NAAR!

3. Qof gaaray darajadii aqooneed ee xaakinnimo sidaas oo kalena xakunkii u qaaday si Ilaahay ku ogyahay, isagoo aan cidna u eexan. Wuxuuna gelayaa JANNADA Alle idankii.

Waxaad mooddaa in dadka Soomaaliyeed masuuliyadda aad u jecel yihiin, halka in badan oo ka mid ahi ayba sheegato darajadii iyagoo aanan gaarin, sida Takhtar, Injineer, Barafasoor, Qareen, Sharciyaqaan iyo wixii la mid ah. Haddaba waxa isweyddiinta mudani waxa weeye, muslimiintu sow maaha kuwii masuuliyadda ka carari jiray xilligii saxaabada Nebi Maxamed (NNKH)? Maxaa isbeddelay?

Waxaan hadda ka hor kula kulmay magaaladda Heeg (The Hague) ee dalka Holland Madaxweynaha Maxkamadda Caddaaladda Adduunka ee loo soo gaabiyo afka qalaad (ICJ) Sharciyaqaan Cabdulqawi Axmed Yusuuf. Inkastoo uu yaraa wakhtigii aan wada joognay, hawlo badan oo u yiillay xafiiskiisa awgeed, haddana waxaan ka fahmay welwelka uu Soomaaliya xaaladdeeda ka qabo iyo sida uu uga niyad jabsan yahay xaalkeeda maammul iyo kan bulsho-ba. Waxyaalaha aan ka xasuusto hadalkiisii oo u badnaa guubaabo iyo dhiirrigelin, waxaa ka mid ahaa: *"Dhallinyarada wax baratay waa iftiin, iftiinna, mugdi ma celin karo ee waddanka u hiilliya oo bulshada ka dhex saara qabyaaladda iyo qurunka ay aamminsan yihiin, si Soomaaliya u noqoto dal xor ah oo ka madax-bannaan dhibaatooyinka ay waqtiga dheer ku jirtay".* Waxaa yaab lahayd, mar uu na tusay labo calan; kuwaas oo kala ahaa Calanka Soomaaliya iyo kan Qaramada Midoobay (UN), oo uu noo sheegay inuu mar wada iibsaday ayna ka samaysan yihiin maryo isku mid iyo isku midab ah, balse uu ka muuqday kala duwanaansho aad u wayn maaddaama kan Soomaaliya uu isbeddelay midab ahaan, halka kii Qaramada Midoobay uu ahaa sidiisii. Wuxuuna sharci yaqaanku u aaneeyey kala duwanaanshaha ku dhacay inay muujinayso sida dhibaatada ka jirta Soomaaliya ay dhan walbaa u saamaysay dad ahaan iyo dal ahaan labadaba.

Marka xilligaan waxbarashada dalka Soomaaliya waa mid aan lahayn miisaan lagu cabbiro, maaddaama ay noqotay mid u burburtay sida uu dalku u burburay. Iskuullada iyo Jaamacadaha waddanka intooda badanna, ay yihiin kuwo loo furtay ujeeddooyin ka duwan mid waxbarasho sida mid ganacsi. Waddanku malaha shuruudo cadcad oo ay tahay in uu buuxiyo qofkiii furanaya Jaamacad taas oo muujinaysa tayo-darrada heerka waxbarasho ee dalka iyo sida ay u dayaceen dowladihii isaga dambeeyey maammulka dalka.

## *Cutubka 9aad:* Dowladda Soomaaliya iyo Sida ay u Shaqayso

Sida caadiga ah, habka dowliga ah ee ka kooban saddexda awoodood oo kala ah Sharcidejinta, Fulinta iyo Garsoorka waxaa loogu talo galay in meesha looga saaro in qolo keli ahi awoodda maroorsato. Habkaan dowladnimo waxaa la sheegaa in uu yahay mid taariikh dheer, waxaana bilowgii fekerkaan curiyey Filasoofarkii Siyaasiga ahaa ee Reer Faransa, Montesquieu gaar ahaan buuggiisii (The Spirit of Laws), waxaana ka mid ahaa dowladihii ugu horreeyey ee qaabkaan dowladnimo isticmaalay waddanka Maraykanka. Waa hab ku dhisan isla xisaabtan, hubin iyo dabagal, kana reebban ku tagrifal awoodeed iyo keli-talisnimo laakiinse, sida beryahaan ay u dhaqmaan madaxda Soomaalida iyo dowladihii dambe, ma jirto awood si cad kala saarni, maaddaama Soomaaliya ay tahay dal ay burbureen dhammaan hay'adihii dowliga ahaa sida garsoorkii iyo hay'adihii fulinta; sidoo kalena ay meesha ka baxday isu dheelli-tirnaantii awoodaha hay'adaha kala duwan ee dowladda sida sharcidejintii, fulintii iyo garsoorkii. Mararka qaar waxaadba mooddaa in meelaha aan ugu liidanno ayba tahay dhanka aqoonta dowladnimo, gaar ahaan garsoorkii iyo maxkamadihii; kuwaas oo aanan lahayn awood hawl-gudasho, aqoon iyo madaxbannaani toonna. Markaad fiiriso sida ay u shaqeeyaan dowladihii burburka ka dambeeyey,

waxaadba mooddaa in ay si toos ah u hoos tagaan qaybta sharcidejinta fulinta oo ah tan keliya waddanka ka fulisa wixii markaas masuuliyiinta halkaas joogta ay ka jeclaystaan. Sidoo kale dastuurka ku meel gaarka ah ee xilligaan dalka ka jiraa wuxuu leeyahay daldaloollo badan ee dhinaca kala saaridda awoodaha. Tusaale ahaan, wuxuu dastuurku ogolyahay qofku in uu ahaan karo xubin sharcidejin, isagoo sidoo kale ka tirsan golaha fulinta. Tani waxay ka mid tahay waxyaalaha dowlado badan ragaadiyey, maaddaama wasiirkii uu marwalba isku deyayo inuu bedbaadiyo danihii golaha fulinta isagoo isticmaalaya awooddiisa sharcidejineed.

Haddii aad wax ka ogtahay siyaasadda gurracan ee Soomaaliya, sidoo kalena waxaad la socotaa in kolkii xubnaha sharcidejinta laga dhex saaray golaha fulinta, ay taasi keentay jidgooyooyin sababay inay xilkoodii ku waayaan Ra'iisalwasaarayaal badan maaddaama xubnaha sharcidejinta markasta lagu tuhmaayey hawlo ka baxsan waajibaadkoodii shaqo ee loo igmaday. Tani waxay si togan u muujinaysaa in ay adagtahay in xilligaan Soomaaliya laga hirgeliyo dowlad leh isu dheellitirnaantii dowladnimo ee saddexda qaybood ee kala madaxa bannaan sharcidejin, fulin iyo garsoor. Xubnaha sharcidejinta oo xilligaan ku yimaada si aan dimuqraadi ahayn, ayaa loo aanaynayaa dhibta ugu wayn sida ay qabaan dad badan oo la socda siyaasadda aan qaangaarka ahayn ee Soomaalida. Sababta ugu wayn ayaa ah

iyagoo ayanba qaybo ka mid ahi lahayn shuruudihii looga baahnaa sharcidejinta sida aqoontii, kartidii iyo waayo-aragnimadii. Xildhibaanada Soomaaliya sida caadiga ah waxaa soo magacaaba oday dhaqameedka beesha markaas leh xubinta sharcidejiyaha. Xilligaas waxaa la aamminsan yahay in ay ku baxdo hanti fara badan qofka markaas xildhibaanka doonaya. Hantidaas ayaa ku baxda qabashada shirarka olalaha ee beesha dhexdeeda ah iyo ciddii kale markaas taageeri karta qofka xubinta doonaya. Qayb ahaan waxaa-ba loo baxshaa hantidaas qadarin iyo laaluushidda oday dhaqameedka beesha iyo gacanyareyaashiisa. Haddaba markii qofkaasi helo xubintaas, wuxuu isku deyayaa in uu kasoo kabto dhaawicii hantiyeed ee soo gaaray xilligii olalaha doonista xubinta xildhibaannimo. Taas oo u baahan in uu meelo badan u gargaraaco. Mooshinnada iyo docadocaynta hawlaha golaha fulinta ayaa ah tan ugu dhow ee laga soo raadin karo hantidii luntay. Sidoo kale, tani waa waddada ugu sahlan ee si fudud loogu soo kabankaro, waxayna badanaa u dhacdaa labo arrin midkood.

**Marka koowaad:** Waa in xildhibaanku isku dayo in uu ku lug yeesho fulinta mashaariicda, si uu uga helo wuxuun faa'iido ah; sida in uu qandaraas la raadiyo qof xiriir ka dhexeeyo, ka dibna faa'iidada wax ka qaato amaba inuu isagu samaysto hay'ado iyo shirkado ka dibna sidaas qandaraasyada ku qaato isagoo

adeegsanaya awooddiisa xildhibaannimo iyo ballanqaad ah in uu codkiisa ku difaaci doona hawlaha ay dowladdu fulinayso.

**Midka labaad:** Waa in xildhibaanku uu qayb ka ahaado qorshayaasha lagu ragaadinayo hawlaha fulinta; dhaliilo, iskuna dayo in aan waxba qabsoomin, si uu u helo mooshin, ka dib na codkiisa u siisto lacag ama hanti kale. Tani waa waddada ugu faa'iido badan markii codkaaga wax lagu raadinaayo.

Arrinkaan ayaa ah mid aan ku koobnayn dowladda kaliya iyo xataa dawladaha xubnaha ka ah xarumahooda sharcidejinta. balse dhibtaan ayaa xataa haysata guddoomiyaasha magaalooyinka ee meelaha dowladaha hoose ay doortaan golaha deegaanku. Haddaan soo qaadano hadal uu jeediyey xilli uu xilwareejin samaynayey xoghayihii hore ee degmada Garowe Cabdiqafaar, isagoo ku dhalliilaya duqii magaalada ee waqtigaas in uu ahaa qof loogu cagajugleeyo maalinkasta in cod loo qaadayo ayuu yiri: *"Guddoomiyaha maalin walba waxaa lagu baadaa, oo uu ka shaqayn waayey xildhibaanno leh waxaan kaa keenaynaa mooshin haddii aadan arrimahayaga noo fulin".*

Dhanka, kale, waxaa iyaguna sidaas oo kale u nugul oday dhaqameedyadii, kuwaas oo meel muhiim ah kaga jira habkeenna dowladnimo. Soomaalida weligeed dhaqanku wuxuu kaga jiray meel sare maaddaama ay u badnayd dad reer guuraa ah, oo dhaqanku leeyahay doorka hoggaaminta bulshada iyo maaraynta

wixii bulshada dhexdeeda ka yimaada, sida xallinta colaadaha iyo ismari-waayada kale ee dhaca. Badanaa waxyaabaha ay isu xilsaaraan odayaashu waxay ahaan jireen kuwo lagu guulaysto, asii waayadan dambe waxaa jiray dhaliilo soo badanayey oo la xariira doorka odayaasha ee maaraynta arrimaha bulshada kasoo dhex baxa. Gaar ahaan marka ay timaaddo soo xulista xubnaha golaha sharcidejinta ee uga mid noqonaya beelahooda. Dhaliilahaan ayaa ku salaysan dhanka caddaaladda iyo tayada ee xubnaha ay soo xulayaan odayaashu; maaddaama in badan oo ka mid ahi aysan fiirin aqoonta iyo waayo-aragnimada qofka ay u xulanayaan in uu metelo.  Sidoo kale, odayaasha waxaa lagu xantaa inay doorkoodii dhaqan ka tageen oo ay ku milmeen siyaasadda iyo inay qayb ka yihiin qaadashada laaluushka iyo musuqmaasuqa daashaday dalka guud ahaan, inkastoo dad badni aamminsan yihiin in qofka markaas xilka doonayaa ka awood badan yahayba odayga dhaqanka ee beeshiisa, maaddaama uu ka hanti roonyahay, oo uu uga faa'iidaysto baahida haysata iyo duruufaha markaas taagan.

Shacabka Soomaaliyeed waa kuwo la qabsaday xumaanta laga dhaxlay burburkii waddanka ku dhacay iyo maammulladii ka horreeyey kuwaa oo aan lahayn siyaasaddo qaangaar ah.  Dadka waddanka ku nool oo ku dhawaad boqolkiiba todobaatan (65%) la aamminsan yahay inay yihiin dhallinyaro, waxay ku dhasheen, kuna koreen iyadoo waddanku ku jiro xaalad kala dambayn

la’aan, qax, dhac, fawdo, musuqmaasuq iyo kala qaybsanaan. Inta waxbaratay waxay iskuullada ku qaateen taariikhda, juquraafiga iyo halgamayaasha waddammo kale oo markaas ay ku xirnayd wixii ay baranayeen. Tusaale ahaan, Dalladaha ku xiran waddama Carabta ayaa inta badan raaca hab waxbarasho (Manhaj) oo ay degsadeen dowladahaas Carabta, kuwaa oo markaas wax uun taageero ah siiya Iskuullada hoos yimaada dalladaha ay xiriirka leeyihiin. Waxaa marag-ma-doonto ah in dalladahaasi ay soo dhaafiyeen wadanka xilli ay noloshu adkayd; sidoo kalena waddanka gudihiisa aysan jirin waxbarasho kale, se hawsha daladaha markasta waxaa la socday galaangal siyaasadeed oo dhaafsiisan mid waxbarasho maaddaama dad badan oo hay’adahaas khayriga ku jiray ay xiriir la lahaayeen waddamo shisheeye oo leh damacyo kala duwan.  Sidoo kale, waxay waddamadaasi isku dayayeen inay ka faa’iidaystaan waddankaas baylahda ah ee aan lahayn dowladda, ugu yaraan si ay ugu yeeshaan saamayn taban iyo in ay khayraadkiisa si dadban u xadaan iyagoo usoo maraya bixinta macaawinooyin iyo saaxiibbadooda ay horay u soo tababarteen.

Nin baa laga sheegay *“Sagaaro sow ima barato ? Markii ay i aragtaba waa ay carartaa, ana weligay ma cayrsan”.* Shacabka Soomaaliyeed sow kama daalaan inay maalin walba siyaasi dan leh dantiisa u fuliyaan? Siyaasi markii uu taageeradooda rabo dhex-yimaada, hadal macaan kula hadla, una muujiya inuu iyaga

ka tirsan yahay, laakiinse markii uu isku hubsado in uu helay jagadaas, si fudud u illaawa. Siyaasi siyaasadda ka yaqaan in hanti la shaqaysto si kastaba haku timaaddee xaaraan iyo xalaal. Siyaasi aan fahamsanayn xeerar dhaqameedka Soomaalida ee xallinta xasaradaha iyo maaraynta arrimaha bulshada, aananna lahayn aqoon iyo khibrad shaqo oo u dhiganta tan looga baahan yahay jagada uu markaas u beratamayo ama uu hantay mar horeba.

Waxaa jirta oraah caan ah taas oo laga soo weriyey saynisyahankii caanka ahaa Albert Anstein ee reer German. Oraahdaas ayaa macnaheedu ahaa: *"Ma xallin karno dhibaatooyinka ina haysta, inta aan u fekerayno si la mid ah tii shalay aan dhibtaan ku abuurnay".* Waa oraah aad mooddo inay xilligaan inagu habboon tahay oo aan u baahannahay in aan u fekerno si ka duwan sidii aan shalay u fekeraynay; mar haddii aan aragnay ficilladeenii hore iyo waxay ina dhaxalsiiyeen. Haddaan si kale u dhigno, waxaan nahay dad muslim ah oo ay ka xarriman tahay waxyaalo badan oo hadda inoo ka dhex muuqda dalkeenna, sida musuqmaasuqa. Ilaahay ayaa Quraankiisa inoogu sheegay in aan duul la beddelin ilaa ay iyagu naftooda beddelaan.

Haddii Soomaalidu markay tagto waddamada galbeedka ay sheegato inay yihiin dad muslim ah, laakiin ay u dhaqmaan si ka baxsan muslimnimada iyo xeerka kale e adduunka u yaalba, sidee

ayey waddanka markay kusoo noqdaan ku keenni karaan isbeddel iyo wax wanaagsan. Tusaale ahaan, in badan oo ka mid ah dadka Soomaaliyeed markay iska diiwaangelinayaan waddamada ay tageen waxay sheegtaan inay yihiin dad muslim ah, balse waxay sameeyaan waxyaabo aan diinta islaanka meelna kasoo gelin. Waxyaalahaas waxaa ka mid ah inay sheegtaan in aysan isqabin, asii carruurta ay iskaga dhalaan saaxiibtinnimo. Marka qof markii uu Yurub ama Maraykan joogay ku noolaa nolol been iyo khiyaali ah sidee xal ugu keeni karaa waddan ay daashadeen dhibaatooyin u baahan maskax fiyow oo leh iimaan, aqoon iyo waayo-aragnimo?

Waxaan luminnay kalsoonidii madaxdeenna inta badan, hase yeeshee lama aynan imaan qaabkii aan uga gudbi lahayn hagardaamooyinka ay markasta inoo dhigayaan, iyagoo aan muhiimmad badan siin danteenna. Masuuliyadda iyo xilkasnimada waxaa kow ka ah in qofka masuulka ahi uu dareemo waajibaadkiisa shaqo iyo hawlihii loo igmaday. Markaas kadib ayuu la imaan karaa wixii laga sugayey, isagoo la kaashanaya awooddiisa iyo tasiilaadka uu haysto. Collin Powell oo ahaa xoghayihii ugu horreeyey oo madow ah oo xoghaye ka noqda dowladda Maraykanka, sidoo kalena ahaa nin aad u maskax badan, furfuran oo masuuliyaddiisa aad uga fekera, in badana kusoo dhexjiray ciidanka ayaa yiri: *“Maalintii ay askartu joojiyaan inay kuu sheegtaan dhibaatooyinkooda, ayaa kuugu*

*dambaysa inaad hoggaamiso. Waayo waxay lumiyeen kalsoonidii ay kugu qabeen ama waxay dareemeen in aadan ka fekerayn. Labadaas arrinba waa guuldarro hoggaamineed"*. Haddaba madaxdeennu intee in le'eg ayey dareenmaan masuuliyad? Haddii laga horyimaado oo lagu mudaharaado, xataa waxay isku dayaan inay raadsadaan kuwo kale oo taageersan, hadday rabto kharash iyo lacagba ha ugu kacdee? Sow guuldaradda hoggaamineed ee dhabta ahi taas maaha?

Markaan dhinac kale, ka fiirinno, Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa *"Hal xaaraan ahi, nirig xalaal ah ma dhasho".* Maahmaahdaan waxaa loola jeedaa in haddii sheyga asalka ahi yahay xaraan, wixii ka farcamaana ay marwalba xaaraan yihiin. Marka su'aasha dad badan oo Soomaaliyeed isweyddiiyaan ayaa ah: Sida qof lagu soo doortay musuqmaasuq uu musuqmaasuq ula diriri-karo?. Haddii aan ognahay in xildhibaanku lacag bixiyo markuu xilka raadinayo si kastaba haku bixiyee, Madaxweynuhuna lacag baxsho marka xilka loo dooranayo oo dadka dooranaya intooda badan ay fiirinayaan keliya dadka markaas tartamaya midka ugu lacag iyo ballanqaad badan ee aysan eegayn kan qorshe fiican, waddanisan oo dadka Soomaaliyeed wax u qaban kara. Markaa sow ma nihin kuwo markasta u nugul inay si sahlan u aqbalaan wixii loo sheego ee aan aqoon, caqli iyo waayo-aragnimo wax ku qiimayn? Kuwo wixii loo sheegaba diyaar u ah inay qaataan ee aan marna fahmi

karin dabinnada iyo shirqoollada loo dhigayo har iyo habeen? Kuwo keliya lagu gaaro faa'iido gaar ahaaneed ama mid koox ahaaneed taas oo aan wax waxtar ah u lahayn bulshada Soomaaliyeed?

Waxaan noqonnay bulsho ay in yari ku danaystaan, oo aan lahayn wax qorshe ah iyo han toonna. Waxaa marwalba shaar inoosoo xirta mid aan arrimaheena wax dan ah ka lahayn. Innaguna kama daalno inaan ku taageerno waxkasta ee aan heli karno, oo xataa haddii ay tahay in aan nafaheenna khatar gelinno oo dagaal la galno.

Waxaa ay madaxdeennu ku dhaartaan kitaabka Alle ee Quraanka kariimka ah, laakiinse kuma dhaqmaan amarrada uu ina farayo iyo waxyaalaha uu inaga reebayo. Taasina waa tan ugu wayn ee Soomaaliya u degi weyday; maaddaama aan noqonay beenaalayaal iyo been kalkaal. Waxaa jirtay qiso uu nooga sheekeeyey macallinkaygii maaddada Tarbiyadda Islaamka iyo Afka Carabiga ee dugsigii sare. Qisadaa ayaa ahayd nin been sheegi jiray, khamradda cabbi jiray, dumarka xunxunna saaxiib la ahaa, balse mar dambe nin sheekh ah u tegay, si uu xaalkiisa uga warramo, kana codsado inuu waxyaalaha uu caadaystay mid ka ugu xun ee uu iska daayo u sheego, maaddaama uu aamminsanaa in uusan mar iska wada joojin karin. Sheekhii wuxuu ku yiri *"Beenta iska daa, ka dib wixii kale waad ka waantoobaysaa.*

*Waayo waxaan oo dhan waxaa hooyo u ah beenta".* Ninkii taladii ayuu qaatay oo wuxuu iska daayey beentii ka dibna Ilaahay wuxuu waafajiyey inuu dhammaan iska joojiyo waxyaalihii xun xumaa ee uu samayn jiray. Sababta u wayn ee keentay in ninkaasi uu dhammaan iska daayo waxyaabihii xumaa, waxay ahayd isagoo beentii iska daayey. Waayo haddii uu khamri cabbo markii qof aan ku ogayn waydiiyo in uu khamriga cabbo, waxay noqotay ama in uu runta u sheego oo dhaho "Haa" khamri ayaan cabbay ama inuu been sheego oo dhaho "Maya" ma cabbin. Haddii uu been sheego macnaheedu waa in uu weli beentii kusii jiro oo uusan joojin beentii. Haddii kale ee uu run sheegana wuxuu noqonayaa nin bulshada dhexdeeda xumaan caadaysta. Waxayna ku suntayaan qof xun oo aan bulshada dhexdeeda qiimo ka lahayn. Sidaas oo kale, haddii uu u tago saaxiibaddiisii dumarka ee xun xumaa, waxay noqonaysaa in uu been sheego ama bulshada dhexdeeda ku ceeboobo. Nebi Muxamadna (NNKH) wuxuu innoo sheegay in beentu dunuubta horgal u tahay, oo ay xumaanta qofka ku hagto. Sidoo kalena ay ka reebban tahay qofka mu'minka ahi in uu been sheego. Marka Soomalida, gaar ahaan siyaasiyiinteedu waa in ay iska daayaan beenta oo ah shey xun oo Ilaahay inaga reebay, kana mid ah dunuubta waaweyn ee ciqaabta badan lagala kulmo. Marka laga yimaado caqiidooyinka ay rumaysan yihiin, haddana beentu waa wax bulshooyinku ay isku raacsan yihiin inay xun tahay.

Haddaan si kale u dhigno, dadka Soomaaliyeed ma laha aqoon wadaninimo (Civic Education), maaddaama marna uu dalku ku jiray gacan gumeysi, marna gacan ciidan iyo xilli ayanba jirin hay'adihii asaasiga ahaa ee dowladnimo; oo dalku u burburay dad ahaan iyo dad ahaanba, sida ku muuqata dhaqankeenna waayadaan dambe oo ah mid dabaysha hadba dhinac u raacaya. Inaan dal ahaan iyo dad ahaan ba u burburnay waxaa daliil u ah, waxaan marwalba aragnaa qof markii xilka laga qaado eedaynaya dowladdii ama maammulkii uu shalay ka tirsanaa. Marka waxaa la yaab leh qofka lagu aamminay masuuliyad qaran, laakiin aanan-ba lahayn dhaqan wanaagsan iyo anshax qurxoon midna.

## *Cutubka 10aad:* Musuqmaasuqa Dalka Soomaaliya Ka jira Guud ahaan

Musuqmaasuqa ayaa Soomaaliya meel sare ka gaaray, waana mid sida caadiga ah ku dhexjira habka maammul ee dalka, ee aan lagu eedayn karin qof ama koox keliya. Qolyaha aadka u faalleeya hababka maammulka dowladnimo, qaybtood waxay aamminsan yihiin in habka dowladnimo ee musuqmaasuqa lagu yarayn karaa uu yahay labo qaybood midkood. Labadaas qaybood ayaa kala ah, in la helo shuruucdii iyo siyaasadihii xaaraamayn lahaa iyo in loo fuliyo shuruucdaas iyo siyaasadahaas si fiican. Sidaas darteed, haddii labadaas dhinac la waayo mid ka mid ah kan kale waa adagtahay in uu si fiican u shaqeeyo. Sidaan kor kusoo xusnay, tan kowaad waa inay dhici karaan musuqmaasuq iyadoo ay jirto dhammaan wixii looga hortagi lahaa ama lagula dagaalami lahaa (Structural Systems); sida shuruucdii ka hortagga, yaraynta, sixidda, iyo hababkii kale ee loo yarayn lahaa dhicitaanka xatooyada ama wax isdabo-marinta. Maaddaama aysan si fiican u shaqayn dhammaan hababkaas iyo qoryashayaashaas latacaalidda musuqmaasuqa. Ujeeddooyinka ay u shaqayn waayeen waxay noqon karaan kuwo badan sida in aysan jirin ka go'naan maammul ama shacab iyo sidoo kale faham-yari amaba awooddii fulinta oo aan jirin.

Bulshadu mar haddii ay la qabsato musuqmaasuqa aysanna jirin hab adag oo khasab kaga dhigaaya ka fogaanta iyo iska ilaalinta musuqmaasuqa, waxaa hubaal ah in arrinkaani uu weligiis sii soconaayo. Tani waxay la mid tahay markii sannadihii 1960-kii uu halgamaagii madoobaa ee Reer maraykan Marthin Luther King iyo ururradii kale ee u dagaallami jiray xuquuqda dadka madow ay lahaayeen "Waxaan rabnaa in aan ka dhamayno caddaalad-darrada ka jirta xafiisyada dowladda Maraykan". Inkastoo markaas ay jireen shuruuc dembi ka dhigaysa midab kala sooca iyo faquuqa dadka dhexdiisa iyo hay'adaha dowladdaba; laakiinse, mudane King wuxuu ku dooday in aysan ku filnayn waxyaalaha la sameeyey maaddaama dhibaatooyinkaani yihiin kuwo habka dowladnimo ka dhex jira.

Tan labaad ayaa ah, iyadoo aysanba jirin hababkii loo yarayn lahaa ama loola dagaallami lahaa masuqmaasuqa dowladda dhexdeeda iyo xataa dibaddeeda. Habkaani waa mid oggolaanaya inay si sahlan hanti faro badan oo dadwayne ay ku gasho gacmaha dad gaar ah.

Dowladda waxaa loo igmaday inay marwalba ka warhayso baahiyaha dadweynaha maaddaama ay iyadu leedahay awoodda maammulka iyo maaraynta khayraadka dalka, Sidoo kalena masuul ka tahay arrimaha bulshada ee nolosha muhiimka u ah sida amniga, caafimaadka iyo waxbarashadda. Balse haddii ay

iyadii qayb ka noqoto dhibaataynta shacabka Soomaaliyeed waxay noqonaysaa arrin ka duwan kii laga filaayey.

Haddaan dhanka kale eegno, shacabka Soomaaliyeed ayaa mar walba kow ka ah dhibaatooyinka daashaday dalka. Gaar ahaan kuwa maammul-xumada iyo musuqmaasuqa. Inkastoo laaluushku uu yahay wax ka dhaca meelo badan oo adduunkaan aan ku noolnahay ah, misana waxaad mooddaa in bulshada Soomaaliyeed ay hadda si caadi ah iskala qabsatay habka liita ee ku dhisan musuqmaasuqa kaas oo si caadi ah uga jira dhammaan qaybaha kala duwan ee xafiisyada dowladda iyo kuwa gaar loo leeyahayba. Waxaan horay usoo xusnay inay adagtahay in ay kuu fusho hawl kaaga xiran xafiis dowladeed oo Soomaaliya gudaheeda ah, ilaa inaad bixiso laaluush mooyaane (Howl fududays), ama aad u adeegsato saaxiibbo masuulka xafiiskaas jooga. Waxaa iyaduna hadda aad ugu soo badanaysa meelaha ganacsi ee gaarka loo leeyahay, gaar ahaan magaaladda Caasimadda ah ee Xamar, goobo ganacsi oo aan si fiican hawsha laguugu qabanayn ilaa aad bixiso lacago dheeraad ah oo ka baxsan inta lagu muujiyo waraaqda lacag qabashadda (Receipt Voucher). Lacagahaas ayaa loo baxshaa hawl fududdays iyo inaad hesho adeeggii aad u baahnayd waqti hore iyo in sidoo kale lagaa hormariyo qofkii kaasoo horreeyey ee aan isagu lacagtaas bixin. Tani waa mid dhiirrigelinaysa in aan u kala hormarno sidii aan laaluush ku bixin lahayn markii aan u baahano in adeeggii aan u

baahnayn si fudud ku helno.  Sidoo kalena waa dembi aan ku dulminayno qofkii aan awoodin in uu iska bixiyo lacagtaas la xalaaleeyey, aananse lahayn sharciyadda.

Bixinta laaluushka waxaa sababa dhowr arrimood oo kala geddisan, kuwaa oo dalabkoodu ka yimaado qofka raba hawsha in loo fududeeyo ama qofka iska leh awoodda qabashada hawshaas loogu fududaynayo sida aan hoos ku sharraxnay:-

1. Arrinka kowaad ayaa ah iyadoo aysan jirin shuruuc ad adag oo reebaaysa adeegsiga bixinta iyo qaadashada laaluushka kuwaas oo dhaqangal ka ah Soomaaliya dhexdeeda. Sidaas darteed qofka leh awoodda fulinta hawsha waxaa dhici karta in uu ku meermeeriyo waqti dheer, ka dibna aad marka dambe siiso laaluush, si uu hawshaada u fududeeyo. Haddana ma aha arrin khasab ah sida caadiga ah

2. Arrinka labaad ayaa ah degdeg ku jira dadka Soomaaliyeed. Dadka Soomaaliyeed waxaa aad ugu yar dulqaadka iyo in hawlaha loo qabanayo ay siiyaan waqti ku filan oo ay hawlahaas ku fulin karaan dadka u xilsaarani; sidaas darteed waxay isku deyayaan inay marka horeba ballanqaad sameeyaan iyo xodxodasho dheeraad ah oo ay ku muujinayaan in ay diyaar u yihiin in ay baxiyaan lacago hawl fududays ah; si loogu hormariyo arrimahooda, ayna u

bogtaan hawlahooda ka hor waqtigii caadiga ahaa ee ay ahayd in hawshaasi ku dhamaato. Arrintaani waa tan keentay in Soomaalida laga qaado lacago baad ah, meelaha kala duwan ee ay adduunka ka joogaan. Tusaale ahaan, markaad joogto dalka Keenya, haddii uu ku garto qofka hawsha kuu qabanayaa in aad tahay Soomaali, inta badan wuxuu isku deyayaa in uu kaa qaado lacago ka badan intii hawsha lagu qaban lahaa, maaddaama ay fahmeen in Soomaalidu dhanka sharciga ay aad ugu liidato oo haddii la yiraahdo waxbaa kaa khaldan ee goobaha sharciga aad ay ku calaacalaan in ay lacag bixinaayan sidii nadaamkaa ay ka baqayaan. Arrinkaani waa kan keenay in Soomaalida lagu kala iibsado meelo badan oo dunida ah, sida dalka Liibiya ka dib markii ay bilaabeen inay bixiyaan intii lacag la waydiiyo; taas oo markii dambe keentay inay la yaabaan qofkii bixin waaya intii ay dalbadaan una fahmaan qof iyaga khayaamaynaya. Xataa waddamada ay sharciyadoodu adagyihiin ee Reer Galbeed, waxaan la soconaa Soomaalidu in ay isku dayaan inay bixiyaan lacago laaluush ah iyagoo ka cabsanaaya inay si sharci ah wax u raadsadaan.

3. Arrinka saddexaad ee sahla bixinta iyo qaadashadda laaluushka ee gudaha dalka Soomaaliya ayaa ah mid lagu khasbo qofka adeegga rabaa in uu bixiyo lacago dheeraad

ah oo sharcidarro ah, haddii kalena uusan helayn adeeggii uu u baahnaa. Tani waa mid ka mid ah dhibaatooyinka ugu waaweyn ee saameeyey dad badan oo Soomaaliyeed kuwaas oo aan lahayn tabar ay ku baxiyaan lacagtaas, lagana yaabo inay ku khasbanaadaan inay siyaabo kale u raadsadaan adeegyada muhiimka ah ee ay uga baahan yihiin inta badan xafiisyada dowladda.

Haddii masuuliyiinta dowladda laga waayo naxariistii iyo masuuliyaddii dowladeed, maxay shaqadoodu kaga duwanaanaysaa ganacsatada marwalba xoogga saara halkii ay macaash ka filaayaan. Waxaa jirta oraah ay dadka dhaqaalaha bartay adeegsadaan markay ka hadlayaan maalgelinta bangiyadu sameeyaan iyo cidda u qalanta in dayn la siiyo, taas oo ah: *"Bangiyadu waxay lacag siiyaan qofkii aan u baahnayn"*. Oraahdaan ayaa macnaheedu yahay in bangiyadu qofka ay lacagta siinayaan ay marka hore hubiyaan tabartiisa, waayo qofka lacagta u baahnan lacag masoo celinaayo ee lacagta waa cunayaa. Balse keliya qofkii  u baahan lacag uu ku shaqaysto ayaa faa'iido laga helayaa.

Dhaqamada dad badan oo Soomaaliyeed ayaa mudgi gelinaya bedqabkooda maskax ahaaneed markaad u fiirsato sida ay u dhaqmaayaan iyo in aysan lahayn qorshe wanaagsan oo mustaqbalkooda dambe khuseeysa. Waxaa jirtay qormo uu qoray

weriye la yiraahdo Zoe Flood, sanadkii 2016, isagoo xiganaya warbxin ay diyaarisay Hay'adda Caafimaadka Adduunka ee loo yaqaan (WHO). Dhammaadkii 2010-kii, warbixintaas ayaa lagu sheegay in dadka Soomaaliya saddex meelood hal meel aysan dhamayn maskax ahaan, taas oo la macne ah in, saddexdii qofba, qof wax u dhiman yihiin maskax ahaan, iyadoo sabab looga dhigay saamaynaha colaadda dabo-dheeraatay, faqriga iyo isticmaalka maandooriyaha sida jaadka. Zoe Flood qormadiisa oo lagu daabacay wargeyska caanka ah ee "The Guardian" ayuu ku sheegay in dadka ku nool Soomaaliland ee madaxa ka jirran, halkaas oo ahayd meeshii uu booqday, aysan helin xuquuqdii iyo xanaanayntii ay u baahnaayeen. Waxaa jirtay sheeko dhexmartay nin waalan oo ku jiray cusbitaal dadka madaxa ka jiran lagu xanaaneeyo iyo madaxdii cusbitaalkaas. Sheekadaas ayaa ahayd sidaan; "Labo bukaan oo kala ah rag iyo dumar, lana kala yiraahdo Fred iyo Mabel ayaa ku jiray Cusbitaal dadka madaxa ka jirran lagu xannaaneeyo. Maalin ayey aadeen berkad lagu dabaasho waxaana ku booday oo berkaddii isku tuurtay Mabel, si ay ugu dabaalato. Laakiin berkada oo dheerayd iyo iyadoo aan dabaal aqoon darteed waxay u quustay xagga hoose ee biyaha, maaddaama berkaddu ahayd mid dheer oo qof aan dabbaal aqooni uusan kasoo bixi karin. Fred oo ahaa ninkii gabadhaas la socday ayaa isagoo aan naftiisa ka fekerin iska daba tuuray, oo gabadhii soo saaray, soona badbaadiyey. Guddigii cusbitaalka madaxda ka

ahaa oo samaynayey qiimayn sannadeed iyo inay meesha ka saaraan dadka intii xanuunkii ka bogsooday ayaa maalinkii dambe u yeeray Fred si ay u abaal mariyaan, meeshana uga siidaayaan. Way u yeereen, waxayna u sheegeen in ay u hayaan labo arrin oo midna ay tahay arrin lagu farxo, midna arrin laga naxo. Waxayna yiraahdeen waan ku faraxsanahay in aad shalay badbaadisay Mabel, waxaana isku raacnay in aad fiicnaatay oo aan Cusbitaalka kaa siidayno, balse nasiib-darro wey is deldeshay Mabel xilligaa badbaadisay ka dib waana ay dhimatay. Waxaase si fudud uga jawaabay Fred oo yiri "Mabel isma dilin, ee anaa suray meesha si biyihii aan kasoo dhexsaaray aan uga qalajiyo"' Sheekadaan waxaan usoo qaatay inay jiraan dad badan oo Soomaaliyeed kuwaa oo aad moodayso inay dad fiyow yihiin markaad aragto ficillada wanaagsan ee ay samaynayaan, se ay maskaxdaadu yaabayso markaad aragto waxyaalo ku adag qofka fiyow iyagoo samaynaya. Sidaas darteed, inkastoo aysan jirin caddaymo waawayn oo aan hadda wada arki karno haddana lama dhayalsan karo warbixintii  Hay'adda Caafimaadka Adduunka ee ahayd "dadka Soomaaliyeed saddexdii qofba mid baa maskax ahaan aan fiyoobayn" Maaddaama aan wax badan ka dhaliilnay qaabka dowladnimo iyo dhaqan bulsho ee Soomaaliya, waxaan  wax ka sheegi doonaa waxyaalaha looga baahan yahay maammul dowladnimo ee suuban qaybta dambe uu buuggaan.

## *Cutubka 11aad:* Qaabka Maaraynta Howladaha Dowladda iyo Mashaariicda Muhiimka ah

Soomaaliya mashaariicda iyo xafiisyada muhiimka ah waxaa madax looga dhigaa kuwa ugu karti iyo aqoon yar; asii ugu dhow, uguna jajaban madaxda ka sarraysa ee markaas talada haysa. Waxay tagaan shirarka, kulamada iyo fagaarayaasha kale ee lagaga wada xaajoonayo qorshayaasha jihaynta waddanka, iyagoo aan wax qorshe ah lahayn. Sidaas darteed waxba kuma kordhiyaan xal u helidda mashaqada daashatay Soomaaliya. Waxayse beddelkeeda isku dayaan in ay sawirro fiican galaan, qosol iyo farxad muujiyaan, saaxiibbo badanna samaystaan. Waa dad aan inta badan lahayn aqoontii, waayo-aragnimadii iyo kartidii looga baahnaa inay kula gorgortamaan dhiggooda. Waxay si fudud ku aqbalaan wax kasta oo ay usoo jeediyaan dadka ay shaqo wadaagta yihiin iyagoo aan ka fekerin cirib-dambeedka ay go'aannadoodu keenni karaan. Markii ay dadka dhiggooda ahi garowsadaan tayo xumadooda, waxay badiyaa sawirtaan in aqoonta iyo kartida dadka Soomaaliyeed sidaas u wada liidato. Waxayna daneeyaasha Soomaalidu mashaariic iyo taageerooyin kale oo fara badan u dib dhigaan ama meel kale ugu weeciyaan in aan shaqaalaha dowladdu lahayn tayadii looga baahnaa aysana aammini karin ilaa inay lacagta sii mariyaan qolo saddexaad oo howsha fulisa maahee. Tanina waa tan sababta in lacagiihii

mashaariicdaas loogu talo galay loo siiyo kharash iyo taageero farsamo oo ay dalbadaan ciddii markaa mashaariicdaas la sii marsiiyo fulintooda; halka shacabka Soomaaliyeed ay gaarto wax aan qiimo wayn lahayn.

Tayo xumada shaqaalaha iyo lataliyeyaasha dowladdu waa mid gaarsiisan heerar kala gedisan, balse intooda badan halis badan. Tusaale ahaan, waxaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya ay gashay heshiisyo iyo is-fahanno badan kuwaa oo intooda badan la saxiixay iyagoo aan helin qareeno iyo sharciyaqaanno lafa gura, si looga fogaado dembi laga galo dalka iyo dadka Soomaaliyeed. Sidoo kale, wax badani kama fulin heshiisyo badan oo ay galeen dowladihii u dambeeyey ee masuuliyadda isu banneeyey sanadihii dambe. Haddaan si gaar ah usoo qaadanno waddanka Kenya ee aan deriska nahay ayna inaga dhexeeyaan arrimo badan oo isku xiran. Sida arrimo dhaqaale, ganacsi, derisnimo ama amni, waxaa jiray heshiisyo badan oo ay la galeen dowladihii Soomaaliya u kala dambeeyey kuwaas oo daaran iskaashi dhaqaale iyo fududaynta isu socodka dadka iyo ganacsiga ee labada waddan, hase yeeshee waxaan oran karnaa ma jirto wax badan oo dadka Soomaaliyeed ay heshiisyaddaas ka faa'iideen. Tusaale ahaan, markii ay dadka Soomaaliyeed u baahdaan in ay booqdaan oo ay howl ka yeeshaan dalka Keenya, waxay kala kulmaan dhibaatooyin aad u farabadan. Dhibaatooyinkaas waxaa ma kid ah in ay waqti badan

ku qaadato helidda dal-ku-galka Kiinya. Sidoo kalena kharash badan ayaa kaga baxa helidda dal-ku-galkaas. Waxaa dal-ku galka Kiinya qofka dhalashada Soomaaliga ah wata loogu soo saaraa ugu yaraan $500 (Shan boqol oo dollarka Marayka ah); taas oo weliba ah arrin aan qarsoonayn ee saraakiisha socdaalka si toos ah loogala xaajoodo.

Sidaan kor kusoo xusnay, waxaa xafiisyada dowladda ee adeegga dadweynaha loogu talo galay inta badan  jooga dad aan lahayn aqoontii, kartidii, waayo-aragnimadii iyo dabeecadihii looga baahnaa; maaddaama ay intooda badani ku yimaadeen xafiisyada waddo aan sharci ahayn sida qabiil, musuqmaasuq, saaxiibtinnimo iyo aragti xisbi aan lahayn sharciyadan siyaasideed oo dalka ka diiwaangashan. Dadkaasi maba kala yaqaanniin waxa ay tahay shaqooyinka ay qabanayaan, marka laga reebo inay xogaha iyo xanta shaqaalaha kale u geeyaan masuuliyiintii ku caawiyey helitaanka xilalka ay hayaan. Sidoo kale aqoonta iyo xirfadaha shaqaaluhu ma aha kuwo lagu qiimeeyo darajo, aqoon iyo karti toonna maaddaama aysan jirin hababkii qiimaynta shaqaalaha dowladda, kuwaa oo muhiim u ah gaarsiinta dadweynaha adeegyadii muhiimka ahaa ee ay u baahnaayeen.

## *Cutubka 12aaad:* Dhibaatooyinka Mareegaha iyo Baraha Bulshada

Soomaalidu waa dad nugul oo marwalba ay ku adeegtaan qolo dan gaara leh. Waxaa beryahaan dambe soo baxay qolyo loo adeegsado marin-habaabinta ummadda Soomaaliyeed; kuwaas oo intooda badan adeegsada baraha bulshadu ku wada xiriirto. Ujeedka arrinkaan ayaa ah in arrimaha muhiimka ah laga leexiyo indhaha dadka, lana tuso waxyaalo u badan dhalanteed oo markaas lagu mashquuliyo, si looga gaaro dano gaar ah. Haddaba waxaan rabaa inaan wax ka taabto halka ay kasoo jeedaan arrimahaasi iyo faa'iidooyinka gaarka ah ee laga leeyahay adeegsigooda dacaayad ahaan.

Waxaa la sheegaa in dunida aan joogno tahay mid isu furan oo si sahlan aad ujeedkaaga ku gaarsiin karto meeshii aad doonto adigoo adeegsanaya aaladaha casriga ah ee teknoloojiyadda cusub. Sidaas darteed markaad rabto inaad si dhib yar u khaladid maskaxda dad ku tiirsan aragti aan run ahayn, waxaad adeegsanaysaa teknoloojiyadda casriga ah, taas oo si fudud u beddeli karta dhammaan dadyowga u nugul dacaayadaha iyo wararka aan salka lahayn. Waxaa jiray oraah laga soo weriyey Wasiirkii Warfaafinta ee Dowladdii Naasiyiinta ee uu hoggaamin jiray Adolf Hitler. Oraahdaas ayaa ahayd: *"Haddii beenta lagu celceliyo, waxay noqotaa ama u ekaataa run".*

Hadalkaani wuxuu noqday qaacido  ay xilligaas ka dib adeegsadaan dowlado iyo siyaasiyiin badan oo ku kala firiqsan adduunweynaha. Waxaa xilliyadaan dambe loo beddelay in wararka beenta ah iyo dacaayadaha dagaal ahaan loo isticmaalo, iyadoo la marin habaabinayo dadweynaha dalalkaas ku nool. Tusaale ahaan, dagaalkii Ciraaq ee lagu riday dowladdii uu hoggaaminayey madaxweyne Saddaam Xuseen ayaa la sheegaa in lagu marin habaabiyey shacabka reer Maraykan, Qaramada Midoobay iyo sidoo kale xulufadii dowladda Maraykan dagaalkaas kula jiray shacabkooda; maaddaama laga dhaadhiciyey war khaldan oo ahaa in madaxweyne Saddaam Xusseen haysto hubka wax gumaada ee loo yaqaan Nukliyeerka (Nuclear), taas oo markii dambe been noqotay. Waxaa sidoo kale, jiray warar badan oo kutiri-kuteen ah, oo reer galbeedku ku eedeeyeen dowladda Ruushku inay dacaayadaha lagaga soo horjeedo hub ahaan u isticmaalaan. Hadalkaas dadkii sida cad u sheegay waxaa ka mid ahaa hoggaamiyaha Germanka Angelo Markel oo iyadu tiri: *“Ruushku wuxuu u adeegsanayaa dacaayadaha hub ahaan si uu u khaldo dadka u dhashay Ruushka”.*

Haddaan u soo noqono dhanka Soomaaliya, waxaa jira warar iyo dacaayaddo badan oo iska hor imaanaya kuwaas oo dadweynaha lagu khaldo.  Dacaayadahaas ayaa loo adeegsadaa in lagu buunbuuniyo waxyaabo aan xaqiiqo ahayn amaba lagu

waxyeelleeyo dhinacyo kaasoo horjeeda, si loo wiiqo saamayntooda siyaasadeed ama bulsho. Badiyaa dadka farriimahaan gudbiyaa ma fahamsana ujeeddooyinka dhabta ah ee laga leeyahay; asii waxay xambaaraan iyagoo aan wax weyn kala socon qorshaha iyo raadka dambe ee ka dhalan doona toonna. Dadkaasi waa kuwo aamminsan in ay yihiin aqoonyahanno iyo siyaasiyiin, laakiin dhabtii waxay ka arradan yihiin dhammaan waxyaalaha ay aamminsan yihiin inay ku fiican yihiin; maaddaama ay u nugul yihiin in ay xambaaraan dacaayado iyo warar been ah oo leh xanaf siyaasadeed iyo dhiillo sokeeye, sababina kara raad dambe oo aan la mahdin.

Sidaan wada ognahay, waxaa fudud qofku in uu wuxuu rabo soo geliyo Internetka ama gudbiyo isagoo aan wax xil ah iska saarin bedqabka qoraallada, muuqaallada iyo codadka uu gudbinaayo iyo saamaynta ay leeyihiin. Arrinkaani waa mid u baahan in ay bulshada Soomaaliyeed ku baraarugsanaato ayna iska dhowraan inay si sahlan ugu dhacaan shirqoollo aysan hubin cirib dambeedkooda. Sidoo kale waxaa habboon in la helo hagayaal guud oo bulshada jiheeya, kana kaalmeeya sida loo adeegsanayo aaladahaan cusub ee teknoloojiyadda, si loo ilaasho sharafta, maskaxda iyo bedqabka shacabka Soomaaliyeed. Waxaan xasuusta 2016 mar aan joogay dalka Jabuuti, Caasumadiisa Jabuuti, in aan is-waraysanay nin dhallinyaro aqoonyahan ah oo dalkaas u dhashay, kaas oo noo sheegay in bartiisa facebookga

laga xayiray kadib markii uu booqday mareeg (Website) dowladda dhaliila. Sidaa awgeed markii aan la yaabo qoraallada, muuqaallada iyo codadka leh xanafta siyaasadeed iyo dhiillooyinka colaadeed oo ay dad badan oo Soomaaliyeed soo gudbinayaan, waxaan isdhahaa malaha waxaa fiicnaan lahayd in Soomaaliya laga hirgeliyo shuruuc aad u ula soconaysa howlaha baraha bulshada si loo yareeyo, loona xaddido qofka sida kuwaa ka jira Jabuuti oo kale. Waxaa in badan oo idinka mid ahi aamminsan tihiin in la dhawro xuquuqda qofka, laakiin sidoo kale waa in aad niyadda ku haysaa in qofka xorriyadiisa la xakamayn karo haddii loo arko in ay xuquuq muwaadin kale ama mid qaran waxyeellaynayso. Sidoo kale lama dhaqi-karo qaran, hadaysan jirin shuruuc adag oo dadka kala saaraysa iyo awood dowladeed oo leh nadaam fulineed oo buuxa.

Waxaa iyaguna leh saamayn xun iyo heer anshaxeed oo aad u liita mareegaha ay Soomaalidu adeegsato intooda badan, maaddaama loo unkay ujeeddooyin gurracan sida mid qabiil iyo mid qof ahaaneed, si loogu gaaro dano gaar ah, looguna jaahwareeriyo dadka Soomaaliyeed warar aan xaqiiqo ahayn oo sal iyo raad toonna lahayn. Marka laga reebo tiro yar oo ka mid ah mareegaha ay dadka Soomaaliyeed wax ku qoraan ama u adeegsadaan faafinta xogaha, intooda badani waa kuwo aad uga arradan habka anshaxa warbaahinta iyo faafreebka xumaha. Gaarista ujeeddooyin gaar ah iyo ka weecinta dadka xaqiiqooyinka dhabta

ah ee dalka ka jira ayaa ah waxyaabaha ugu waaweyn ee loo samaysto mareego warfaafineed xilliyadaan dambe. Mareegahaan oo tiro beelay ayaa ku dhisan hab qabiileed ay lahaanshihiisa iyo maammulkiisaba gacanta ku hayaan dad kooban, kuwaas oo wararka beenta iyo dacaadayaha ah ku sameeya ama ku gudbiya si sahlan. Siyaasiyiinta ku jira olalaha siyaasadeed iyo qolyaha markaas isu arka mucaaradka ayaa ugu badan kuwa adeegsada dacaayadaha beenta ah iyo wararka xanafta colaadeed leh, si ay dadka uga horkeenaan cidda waqtigaas talada haysa, una gaaraan guulo siyaasadeed oo aan hiraal fog lahayn. Waxaan hadda ka hor, qayb ka akhriyey war bixin laga qoray xasuuqii dalka Ruwaanda taas oo loogu magac daray "Warbaahinta iyo Xasuuqii Ruwaanda" (The Media and the Rwanda Genocide). Warbixintaas oo loo soo bandhigay Ururka Qaramada Midoobay bishii maarso ee sanadkii 2004 ayaa si toos ah ugu eedaysay warbaahinta inay lahayd doorkii ugu weynaa xasuuqii dalkaas ka dhacay maaddaama xilligaas warbaahinta loo adeegsaday kicinta nacaybka iyo hurinta colaada.

Gabagabaddii, marka dib loo fiiriyo qaabka gurracan ee dadka Soomaaliyeed u adeegsadaan baraha bulshada, u nuglaanshaha bulshada Soomaaliyeed ee gudbinta dacaayadaha iyo wararka kale, ee leh xanafta siyaasadeed iyo dhiilladda colaadeed, maqnaanshaha shuruucdii xakamaynta xumaha iyo awooddii fulinta ee dowladnimo, waxaad dareemaysaa in ay dad badan oo

Soomaaliyeed kuwaas oo  u badan dhallinyarro ay maalin kasta u dulman yihiin xambaarista fikrado iyo gefaf aysan fahamsanayn raad dambeedkooda iyo ujeeddooyinka loo asteeyey toonna. Taas oo u baahan feejignaan dheeri ah iyo digtoonaan wadareed, si loo yareeyo ku tiirsanaanta wararka iyo xogaha aan dhabta ahayn ee loola jeedo marin habaabinta iyo ka leexinta shacabka Soomaaliyeed arrimaha muhiimka ah ee u baahan in wax laga qabto.

## *Cutubka 13aad:* Sidee Waddan Lagu Horumarin karaa?

Horumarka dal walbaa gaaro waa midka ay keenaan dadkiisa, laakiin ma jirto dal ay cid kale horumarintiisa ka fekerto. Cilmibaarisyo badan oo la sameeyey waxaa lagu caddeeyey in horumarka waddanku uusan ku xirnayn khayraadka wadankaasi leeyahay keliya, balse ay saldhig u tahay sida khayraadka dalkaas looga faa'iidaysto. Hal abuurka iyo aqoonta ayaa ah waxa ugu muhiimsan marka laga hadlayo wadooyinka guusha iyo horumarka bulsho. Tusaale ahaan, waddanka Japan oo ka mid ah waddamada ugu horreeya adduunka dhanka dhaqaalaha iyo wershadaha, ayaan lahayn wax khayraad ah iyo dhul-beereed toonna. Balse wuxuu adduunka kale u dhoofiyaa alaabo kala duwan oo warshadaysan. Tani waxay ina baraysaa in khayraadka waddanka iyo firfircoonida dadka iyo hal-abuurku ay kala yihiin labo arrin oo kala geddisan. Si kasta oo waddankaasi u yahay mid khayraad ka buuxo sida Soomaaliya oo kale, haddaan dadku la imaan kartidii iyo farsamadii lagu maarayn lahaa, loogana faa'iidaysan lahaa hantidaas, waxay ku jirayaan faqri, gaajo, colaad, xasillooni darro; iyo ugu dambayn cudurro iyo mustaqbal xumo. Lama inkiri-karo waddan kastaa in uu leeyahay kuwo aragti xun oo dhanka qalloocan wax ka fiiriya, balse haddii dadka intiisa fiican ay badan yihiin, marna macquul ma aha in dadka

waddankaasi ay noqdaan kuwo dhanka xun wax ka wada fiiriya. Kala feker duwanaanta iyo in qofba arrinta dhinac ka fiiriyaa waa arrin dabiici ah oo Ilaahay dadka ku beeray; laakiin marna qiil noqon mayso in waddan dhan loo burburiyo kala ra'yi duwanaan, qabiilaysi iyo eex taas oo aan ognahay waxa dhamaadkeedu yahay adduun iyo aakhiroba. Sidaas awgeed kolkii ay kuu dheertahay in aadanba ogayn halka aad joogto, qorshena aadan lahayn, waxaan oran karnaa tani waa habqan.

Badanaa hagayaasha guud ee waddan kasta waxaa ugu horreeya siyaasadaha iyo qorshayaasha kale ee horumarineed. Kuwaa oo leh muhiimmadda labaad  marka laga yimaado dadkii howshaas qaban lahaa. Siyaasadahaa iyo qorshayaashaasi waa kuwii tilmaami lahaa waddooyinka la marayo iyo sidii loo mari lahaa xilli dhow, xilli dhexe ama xilli fog; waana inay ahaadaan kuwo la dejiyo iyadoo loo fiirinayo baahida waddanka, ka dibna loogu dhaqmaa sidii loo dhaqangelin lahaaa. Laakiinse, si taas ka duwan Soomaaliya waxaad arkaysaa siyaasado iyo qorshayaal qoran oo misana aan cidna adeegsanayn. Waxaaba badankood waqtigoodu dhammaadaa ka hor inta aan la isticmaalin. Tani waa mid ka mid ah waxyaabaha Soomaaliya ragaadiyey oo dib u dhigay dal iyo dad ahaan-ba, maaddaama aan wax tixgelin iyo qaddarin ah loo muujin siyaasadihii iyo qorshayaashii guud ee horay loo degsaday, kuwaas oo ay ku baxeen hanti badan sida waqti badan iyo lacago fara badan oo lagu kharash gareeyey xilligii la

samaynayey. Haddaba bal aan fiirino ujeeddooyinka ugu waaweyn ee siyaasadahaas iyo qorshayaashaasi Soomaalida dhexdeeda uga fuli waayeen ka dib markii la sameeyey. Aan u kala qaadno dhowr arrimoood oo kala jaad ah. Arrinka kowaad ayaa dad badni aamminsan yihiin in uu yahay dadka jooga xafiisyadaan oo aan muhiimmad wayn u arag raacidda iyo adeegsiga siyaasidahaan iyo qorshayaashaan ay hantida badni ku baxday, maaddaama laga yaabo in aysan ku kalsoonayn qaabka ay awoodahooda u xakamaynayaan. Laakiin keliya ay waqti badan geliyaan siday ku fulin lahaayeen wixii markaas ay ku jirto dantooda gaarka ah. Sidoo kale, waxa marar badan dhacda in masuuliyiintaani ku guuldaraystaan dhamasytirka hawlahaan muhiimka ah muddada xil-hayntooda ayna ka tagaan siyaasado iyo qorshayaal badan oo qabyo ah (Draft).

Arrinka labaad ayaa ah, in markii horeba siyaasadahaan iyo qorshayaashaan loo sameeyey iyadoo aysan ka raalli ahayn masuuliyiinta xafiisyadaan joogaa; balse ay ku khasbaan bahwadaagta xafiiskaas, sida hay'adaha iyo deeq bixiyayaasha kale ee mashaariicda maalgeliya oo shardi uga dhiga samaynta qorshayaal iyo siyaasado haga mashaariicda ay taageerayaan. Tani ma aha arrin lala yaabo maaddaama lacagaha gargaarka loogu magacdaro ay in badan oo ka mid ahi ku baxdo hay'adaha markaas fulinaya mashaariicda iyo deeq bixiyayaasha qudhooda amaba shuruudaha ay markaas ku xiraan fulinta hawlahaas.

Sidoo kale siyaasado badan oo aan markaas muhiim ahayn ayaa waxa loo raadiyaa maalgelin, si shaqo loogu abuuro saaxiibbo iyo dad kale oo ay dano gaar ah ka leeyihiin dadka xafiiskaas madaxda u ah.  Arrinka saddexaad ayaa ah, is-bedbeddelka masuuliyiinta xafiisyada jooga oo aan in badan horay usii raacin meeshii masuulkii ka horreeyey wax marinayey.  Arrinka afraad ahna mid ka mid ah kuwa ugu waaayn ee hortaagan fulinta siyadahaan iyo qorshayaashaan ayaa ah kharash la'aan ku timaadda fulinta siyaasaddaas iyo mashaariicdaas ka dib markii la sameeyo.

## *Cutubka 14aad:* Waa maxay Dowlad?

Dowladdu waa cidda markaa haysa talada dal, kuwaas oo leh dhammaan awoodda maammul ee waddankaas; si kastaba haku timaaddee, sida doorasho, magacaabid, iska dhaxlid iyo adeegsi xoog. Sida uu aamminsanaa saynisyahankii reer Greek Aristotle, habka dowladnimo waxa uu noqon karaa jaadad badan sida mid uu taladiisa hayo hal qof, mid taladiisa ay hayaan dhowr qof iyo mid taladiisa ay hayaan dad badan. Haddaba aan waxyar ka taabano qaybo ka mid ah hababka maammul ee dowladnimo si aan u yara iftiimino mid walba.

1. **Boqortooyo** (Monarch): boqortooyo waa hab maammul oo ka jira meelo badan oo adduunka ka mid ah. Waa hab dowladnimo oo waqti dheer soo jiray marka loo barbar dhigo hababka kale ee maammul, waxaana badanaa xukunkiisa haya dad kooban, oo intooda badani ay ku yimaada awooda qaab isdhaxlid ama xukun iska dhaxlid ah.
2. **Keli-talisnimo** (Dictatorship): Keli-talisnimadu waa hab maammul dowladnimo oo maammulkiisa uu hayo keliya hal qof, kaas oo leh dhammaan awoodda sare ee fulinta isagoo aan talada ka qaybgelin cid kale.
3. **Dimuqraadi** (Democracy): habka dowladnimo oo ku dhisan Dimuqraadiyadda ayaa ah mid ka mid ah qaababka maammul ee talada waddankaas ay hayaan dad badan si wadaag ah, sidoo

kalena waxaa si toos ah talada wax ugu leh dhammaan dadka dalkaas u dhashay maaaddaama ay madaxda wadankaasi si toos ah shacabku usoo doorto.

***Anshaxa Dowladnimo***

Markii laga hadlaayo dowladnimo waa inay jiraan habab anshax maammul oo la raaco. Anshaxu waa eray loo adeegsado ilaalinta shuruucda iyo nadaamyada kale ee u yaal dal, dowlad, shirkad, bulsho iyo wixii la mid ah. Meel walba oo shaqo waxaa ka jira nadaamyo iyo nadaam hoosaadyo hawleed oo u gaar ah. Kuwaa oo ay tahay in qof walba oo meeshaas ka shaqeeya ama la leh xiriir kale uu ilaasho maaddaama ay tahay goob shaqo oo leh ujeeddooyin, qorshayal, istaraatiijiyado iyo xeerar u gaar ah.

Sidoo kale waxaa jira heer anshax oo ay tahay inuu fahmo, oo ku shaqeeyo qof walba oo bartay kulliyad aqooneed, sida Anshaxa, Caafimaadka (Doctor's Hippocratic Oath) oo dadka caafimaadka bartay laga rabo in ay fahmaan, kuna dhaqmaan si ay u ballanqaadaan in ay caawinayaan qofkasta oo xanuunsan intii awooddooda ah. Anshaxa Ganacsiga, Anshaxa Warbaahinta iyo I.W.M ayaa iyaguna jira.

Anshaxa Akhalaaqda (Code of Conduct) ayaa badanaa ah mid loo dejiyo si loo yareeyo khilaafaadka iyo danaha gaarka ah. Sidoo kale na, waa hage tilmaamaya habka loo xallinaayo haddii ay dhacaan waxyaalo aan habboonayn, sida xatooyo iyo

musuqmaasuq. Xeerarkan anshax ama akhalaaqeed ayaa u kala duwan sida ay u kala duwan yihiin bulshooyinka dhaqamadoodu maaddaama uu ku dhisanyahay waxa bulshadaasi u fahansan tahay sax ama khalad. Tusaale ahaan, waxaa bulshooyinka muslimka ah ka reebban in qofku cabbo khamriga ama uu sinaysto; halka waddama reer galbeedka uu qofku xor u yahay wuxuu naftiisa ka doono laakiinse, si loo ilaasho danta guud ee bulshooyinkaas waxaa dhammaan laysku raacsan yahay in musuqmaasuqa iyo xatooyada hantida dadweynuhu tahay dembi sababi kara ciqaab culus. Sidaas darteed, markii laga hadlaayo dowladnimada waxaa jira dhowr qaybood oo ay tahay in loo ilaasho anshaxa maammulka ee dadka dowladda ku jira.

Waxyaalaha ka reebban masuuliyiiinta dowladda, kana baxsan habka anshaxa dowladnimo kuwaa oo badanaa ka dhaca waddamo badan oo ay Soomaaliya ka midtahay waxaa ka mid ah:-

1. ***Xatooyada iyo Wax Isdabo-marinta***: xatooyada ayaa ah mid ka mid ah falalka ugu waaweyn ee ay galaan saraakiisha dowladda, si ay qaab aan waafaqsanayn shuruucda iyo nadaamyada dalka ugu adeegsadaan hantida dadweynaha iyagoo sheeganaya kharashyo sax ah oo ay galeen xafiisyada dowladda ee ay jogaan. Xataa inta badan waxaa dhacda in saaraakiishaani ay la yimaadaan waraaqo

iyo dikumiintiyo caddaynaya lacagaha iyo hantida kale ee ay sheeganayaan.

2. ***Bixinta Xogaha Muhiimka ah***: xogaha iyo siraha muhiimka ah ee lagu aamminay xafiisyada iyo hay'adaha kale ee dowladda waxaa reebban inay dibadda u baxaan sidaa darteed gudbinta iyo siidaynta xogo muhiim ah qaab aan sharciga waafaqsanayn waxay ka mid tahay hababka qaldan ee kasoo horjeeda anshaxa madaxda iyo masuuliyiinta xafiisyadda dowladda jooga, maaddaama xogahaan ay leeyihiin sir qaran ama mid muwaadin. Sidoo kale, bixinta xogaha farsamo sida lacaga qandaraasyada ay dowladdu soo xayeysiiso oo kale ayaa ka reebban masuulku inuu sheego. Waxaa iyadana aan la oggolayn in qof dowlada horay ugusoo shaqeeyey laga gudbiyo xogo sir ah oo dhaawici kara mustaqbalkiisa nafeed iyo midkiisa xirfadeed.

3. ***Adeegsiga Hantida Dadweynaha si aan Sharci Ahayn***: Hantida dadweynaha waxaa ka mid ah waxkasta oo raasumaal ah ee lagu keenay ama laga sameeyey hantida dalka sida baabuurta iyo xafiisyada. Adeegsiga hantidaan sida baabuurta, qaab ka baxsan hawl maalmeedkooda shaqo ayaa ah sharci-darro. Halka laga yaabo meelo badan oo Afrika u badan sida Soomaaliya oo kale in qofku horay usii

kaxaysto gaariga xafiiska markii ay dhammaato muddo xileedkiisa shaqo; maaddaama aan masuuliyiin badni si fiican u kala aqoon hantida dadweynaha iyo middooda gaarka ah. Waxaa sidoo kale dhici karta in loo adeegsado qalabka xafiisyada, guryaha iyo dhulka banaan ee dadweynaha ujeeddooyin gaar ah oo baalmarsan habka maammulka suuban.

4. ***Danta Gaarka ah*:** Masuuliyiinta dowladda waxaa ka reebban eex iyo fulinta dano gaar ah xilliga ay xafiisyada joogaan, si loo kala saaro howlaha gaarka ah iyo danta guud. Masuuliyiin badan ayaa awoodda dowladnimo uga faa'iidaysta inay ku fushadaan dano gaar ah si ay uga helaan faa'iidooyin qof ahaaneed. Inta badan arrimahaani waxay dhacaan marka masuulku awooddiisa dowladnimo ugu eexdo qof ay qaraabo, saaxiib ama dan wadaag yihiin, si ka baxshan shuruucda iyo habka maammulka wanaagsan ee dowladnimo. Qaadashada shaqalaaha xafiisyada iyo hay'adaha kale ee dowladda aya waqtiyo badan la kulma kala jeclaysi iyo eex ku salaysan dano gaar ah; sida mid qabiil, mid hantiyeed ama mid ujeeddooyin kale oo masuulka xafiiskaas jooga khaas u ah. Si lamid ah waddamo badan oo dunida ku yaal dalka Soomaaliya waxaa adag in qofku aqoontiisa, waayo-aragnimadiisa iyo

kartidiisa qof ahaneed uu ku helo shaqo iyadoo ayan jirin wax taageero ah oo loo fidiyey.

Haddii si aan habboonayn ay ku yimaadaan shaqaalihii bixin lahaa adeegga dadweynaha, sida shaqaalaha rayidka ah ee dowladda ama xirfadleyaasha muddada kooban, waxaa khasab ah inay keenayso dhibaatooyin faro badan, sida tayo xumo iyo kalsoonidii dadweynaha iyo saaxiibbada kale ee dowladda oo lunta.

5. ***Laaluushka-*** Laaluushka ayaa ah midka ugu u badan ee ka dhaca xafiisyada dowladaha, kaas oo saraakiisha iyo masuuliyiinta kale ee xafiisyada joogta la siiyo lacago iyo waxyaabo kale si ay u fududeeyaan hawl markaas taagan. Masuuliyiintaas ayaa awooddooda shaqo uga faa'iidaysta inay u adeegsadaan qaab gurracan, si ay ugu kasbadaan maal ama waxyaalo kale oo ay markaas doonayaan. Kuwaas oo ah sharci darro, isla markaana baalmarsan hababka maammulka wanaagsan iyo dowladnimada suuban.

## *Hababka La dagaallanka iyo Yaraynta Masuqmaasuqa iyo Anshax-xumada*

Dowladdu waa inay leedahay qorshayaal, siyaasado, istaraatiijiyado iyo hannaan hoosaadyo lagula dagaallamo

musuqmaasuqa iyo falalka kale ee anshax xumada ah ee ka dhaca xafiisyada iyo hay'adaha kale ee dowladda. Hababkaas waxaa ka mid ah kuwaan soo socda:-

1. ***Siinta Bulshada Door ay kaga Qayb qaadato Howlaha Dowladdu Qabanayso*:** Waxaa muhiim ah in bulshaweynta la siiyo kaalin ay kaga qayb qaadato arrimaha ujeeddooyinka muhiimka ah leh, si ay canshuur bixiyaashu u ogaadaan meelaha loo adeegsaday lacagihii ay bixiyeen, sidoo kalena ay ugu darsadaan fekerkooda.

2. ***Daahfurnaan*:** Hirgelinta nadaam daahfuran oo ay muwaaddiniinta dalkaas u dhashay ogaan karaan sida loo maareeyo dakhliga soo gala dowladda iyo hababka anshax ee saraakiisha dowladdu ku dhaqmaan ayaa ah arrin muhiim ah marka laga hadlayo qaabka anshax ee ay u dhaqmaan shaqaalaha dowladdu.

3. ***Isla xisaabtan*:** Dabagalka waxyaalaha ay qabanayaan masuuliyiinta dowladda iyo hirgelinta hannaan ku dhisan isla xisaabtan wuxuu ka mid yahay qaababka lagu yarayn karo musuqmaasuqa.

## *Cutubka 15aad:* Muhiimmada Door siinta Dadweynaha

Ka qayb qaadashada dadweynaha ee arrimha bulshadu waa xoojinta doorka shacabka, si ay u doortaan ama usoo xushaan madaxdooda, uguna sheegaan wixii ay qaban lahaayeen. Doorasho waxay dhacdaa markii uu jiro hab dowladnimo oo ku dhisan dimuqraadiyad, kaas oo dadku leeyihiin awood ay si toos ah ugu dooran karaan cidda iyaga metelaysa. Halka xulistu ay ku timaaddo siyaabo kala duwan; sida Soomaaliya oo kale oo ay soo xulaan xubnaha sharcidejinta, ka dibna ay iyagu doortaan madaxda sare ee dalka. Sidoo kale waxaa habka dowladnimo noqon karaa mid ku dhisan Boqortooyo ama Keli-talisnimo; laakiin, sida caadiga ah markaas dadka waxbadan lama waydiiyo, loomana oggolaado inay ka qayb qaataan talada dalka, balse go'aannada waxaa gaara hal qof ama koox isku xiran oo leh hal hadaf.

Faa'iidooyinka ka qayb qaadashada dadweynaha ee arrimaha bulshadu waa ay badan yihiin, waxaana ka mid ah arrimahaan soo socda:-

1. ***Xoojinta Xiriirka Ka dhexeeya Dadweynaha iyo Madaxdooda*:** Markii ay dadweynuhu qayb ka noqdaan go'aamada saamaynaya mustaqbalkooda, waxaa iyana

fududaanaysa is dhexgalka shacabka iyo masuuliyiintooda, iyo sidoo kale xoojinta xiriirka wada shaqayneed ee ka dhaxeeya.

2. ***Daahfurnaan:*** Ka qaybqaadashada dadweynaha ee arrimaha muhiimka ahi waxay keenaysaa daahfurnaan iyo in dadwaynuhu ka war hayaan waxa ay masuuliyiintoodu qabanayaan. Markaas waxaa meesha ka baxaya tuhunka iyo dacaayadaha ay sameeyaan dadka badanaa iska horkeena shacabka iyo madaxdooda. Tani waa marka ay soomaalidu ku maahmaado *"Nin gunti xumi, inuu wax qarsanaayo ayaa la moodaa"*

3. ***Isla xisaabtan*****:** Ka qayb ahaanshaha dadwaynaha ee arrimaha guud waxay siinaysaa awood ay ku ogaadaan hawlaha iyo mashaariicda socota ayna kula xisaabtamaan madaxdoodu halka ay ku bixiso canshuurta iyo khayraadka kale ee dalka.

4. ***Dhowrista Shuruucda iyo Nadaamyada kale ee Dalka*****:** Dadweynuhu haddii ay xiriir fiican la leeyihiin masuuliyiintooda waxaa sahlanaanaysa in ay fahmaan shuruucda iyo nadaamyada kale ee dalka, ayna ilaaliyaan.

5. ***Dareemid Lahaansho*****:** Markii dadweynuhu ay qayb ka yihiin go'aannada dalka iyo gaar ahaan kuwa iyaga

khuseeya, waxay keenaysaa inay dareemaan lahaasho ayna ilaashaan hantida dadweynaha, sidoo kalena ay ku darsadaan hanti iyo xoog labadaba.

6. ***Tayada oo Hagaagta*:** Ku lug lahaanshaha dadweynaha ee jihaynta iyo maammulka guud ee dalku waxay xoojinaysaa tayada adeegyada dowladda iyo gaarsiinta meelihii loogu talo galay.

7. ***Bulsho Firfircoon*:** Bulsho kasta oo leh awood ay kaga qayb ahaato qaabaynta iyo fulinta mashaariicda iyo adeegyada kale ee dalka, waxay leedahay firfircoonaan dheeri ah iyo inay la socdaan waxa ay qabanayaan masuuliyiintooda iyo madaxdoodu.

8. ***Isbeddel*:** Haddii dalkaas la rabo in laga hirgeliyo isbeddel bulsho marna lama gaari karo ilaa shacabka dalkaas u dhashay la siiyo fursad ay kaga qayb qaataan masiirkooda.

***Caqabadda ka Qayb qaadashada ee Dadweynaha***

1. ***Waxay u baahantahay hanti badan sida kharash iyo waqti:*** Inkastoo ay ka qayb qaadashada dadweynuhu aad muhiim u tahay, misana waa in ay leedahay heer ay gaarsiisan tahay si looga fogaado inay ku baxdo kharashaad faro badan, sidoo kalena ay qaadato waqti dheer maaddaama ayan sahlanayn in la dhageysto aragtida qof

walba. Sidaas awgeed, waa inay marwalba jirtaa tiro meteli karta inta kale, iyadoo aan waqti iyo hanti badan la khasaarin. Hirgelinta hab u oggolaanaya qof walba in uu taladiisa ku darsado qorshayaasha horumarineed ee dowladda ayaa laga rabaa masuliyiinta dowladda; meelahaas oo xogta si fudud loogu reebi karo sida telephone lacag la'aan ah oo la wacayo ama farriin loo dirayo iyo hab online ah oo si fudud farriin loogu diri karo.

2. ***Waxaa Dhici karta in Qaybo Bulshada Ka mid ah ay Afduubaan Bulshada Inteeda kale*:** Tan waxaan ula jeedaa in qayb bulshada ka mid ahi ay marwalba kasoo horreeyaan inta kale, ayna noqdaan kuwa iyaga wax la waydiinayo, kuwaas oo aan ka turjumayn bulshawaynta guud; balse leh ujeeddooyin iyo aragtiyo gaar ah. Ha ahaadeen kuwo dhaqaale ama wax uun kale. Waxaan ognahay in aadamigu ay mar kasta ku dhexjiraan kuwo leh damac ka duwan danta guud, laakiin ay isu ekaysiiyaan inay bulshawaynta baahideeda ka turjumaayaan, si ay u gaaraan dano gurracan oo iyaga u gaar ah. Sidaas darteed, waxaa muhiim ah in markasta la hubiyo cidda bulshada meteli karta, si looga fogaado in qolo gaar ahi afduubato qorshayaasha dadweynaha.

3. ***Colaado*:** Kala feker duwanaanta aadamigu waa wax dabiici ah oo Ilaahay ku beeray. Sidaas awgeed markii taladooda dib loogusoo celiyo iyaga dhexdooda, waxaa inta badan dhacda inay isku khilaafaan; marka, si taas looga gaashaanto waa inaan markasta qorshaha ku darsanaa sidaan qof walba ama koox walba ay u dhegaysan lahayn fekerkooda gaarka ah ee ay qabaan, ka dibna aan uga qaadan lahayn inta muhiimka ah innagoo aan u muujin inaan taladoodii ka tagnay ama aysan muhiim ahayn. Tani waa arrin u baahan inay dadka hawshaan qabanayaa yihiin dad leh tababar wanaagsan iyo xirfado sare.

4. ***Yaraynta Doorka Dadkii Masuuliyadda Hayey*:** Iyadoo lagu salaynayo kala duwanaanshaha bulshooyinka iyo hadba meesha ay ka gaareen ilbaxnimadda. Waxaa muhiim ah in markasta la dhawro kaalinta/doorka masuuliyiinta howlahaas horay loogu idmaday. Waa inay jirtaa habab u oggolaanaya howlaha qaar iyagu inay go'aan ka gaari karaan iyagoo aan cid kale kala tashan maaddaama ay haystaan kalsoonida dadka ay metelaan oo horay usoo wakiishay.

# *Cutubka 16aad*: Waa Maxay Adeegga Dadweynaha

Adeegga dadweynuhu waa habka iyo nadaamka maammul ee bulsho gaar ah si loo hirgeliyo qorshayaasha, siyaasadaha, shuruucda iyo hababka kale ee maammulka dowladnimo, loonna gaarsiiyo adeegyada dadweynaha, gaar ahaan canshuur bixiyaasha dalkaas. Waxaa jira siyaabo badan oo lagu sharraxo adeegga dadweynaha kuwaas oo inta badan isku macne dhow. Muhiimmadu waa in la qabto howlaha kala duwan ee dowladda, sida fulinta, sharcidejinta iyo garsoorka ee heer dowlad dhexe ilaa heer degmo, maaddaama loo baahan yahay waxqabadyo kala geddisan sida qorshayn, maarayn, hagid, dabagal, qiimayn, jaangoyn iyo wixii la mid ah.

### *Muhiimmada Adeegga Dadweynaha*

Sida ay qabaan khuburo badan oo ku xeeldheer arrimaha maammulka iyo adeegga dadweynaha, waxaa jira kaalin sii kordhaya marka laga hadlayo faa'iidooyinka iyo muhiimmadda adeegga dadweynaha. Sidaas darteed adeegga dadweynuhu sababta uu muhiimka u yahay waxaa ka mid ah:

1. Maaraynta iyo sugidda amniga
2. Horumarinta technologiyadda iyo sayniska

3. Difaaca iyo la dagaalanka cadowga
4. Horumarinta ganacsiga iyo warshadaha
5. Maaraynta masiibooyinka iyo
6. Hagidda guud ee wadanka dal iyo dadba, sidoo kale samaynta iyo fulinta shuruucda, siyaasadaha, istaraatiijiyadaha iyo qorshayaasha qaran ee dalka.

***Waa kuma Adeege Dadweyne (Public Servant)?***

Adeegaha dadweynuhu waa masuulka loo xilsaaray u adeegidda dadweynaha, si shacabka dalkaasi ay u helaan adeegyadii muhiimka u ahaa nolosha, sida amni, hoy, biyo, cunto iyo waxbarasho; si loo gaarsiiyo adeegyada asaasiga ah. Si taas la mid ah wuxuu masuul ka yahay horumarinta bulsho iyo dal ahaan-ba, iyo in uu hubiyo in adeegga dadweynuhu uu gaaro cid kasta oo xaq uleh. Taageeridda cidda markaas mudan ee leh baahiyaha gaarka ah iyo ka warhaynta baahiya dhabta ah ee bulshadaasi qabto si loo raadiyo xalkeeda. Adeegaha dadweynuhu wuxuu ku shaqeeyaa doonista iyo rabitaanka dadka uu masuulka u yahay, laakiinse malaha awood uu ku sameeyo wixii markaas isaga la wanaagsan.

## *Cutubka 17aad*: Isbeddel Maxaa Loola Jeedaa?

Haddii aan in badan dhalliilnay qaabka maammul iyo dhaqan bulsho ee Soomaalida, waxaa isweyddiin mudan waa maxay isbeddelka loo baahan yahay? Isbeddelku waa in wax laga beddelo hab dhaqanka, siyaasadda ama hab nololeedka bulsho si looga gudbo dhibaatooyin markaas taagan, kuwaas oo leh saamayn dhaqaale, dhaqan, caafimaad, amni, diin iyo wixii la mid ah. Tusaale ahaan, waxaa bulshooyin badan dhibi ka haysataa dhanka nadaafadda iyo maaraynta qashinka taas oo keenta xanuuno ku dhaca dadyowgaas, haddii ayan si fiican isaga maarayn qashinka iyo wasakhda kale ee keeni kara caafimaad darrada marka taa si looga gudbo waa in la sameeyaa wacyigelino badan oo caafimaad, sidoo kalena la diyaariyaa qorshayaal, siyaasado iyo shuruuc wax looga qabanayo, ciddii aan ku dhaqminna ay kala kulmayaan ganaaxyo iyo ciqaabo kale oo ad adag.

Samaynta isbeddel bulsho ma aha wax si fudud ku imaan kara, laakiin waa arrin u baahan dadaal dheer, waqti  iyo hanti fara badan. Sidoo kale waa arrin u baahan dulqaad iyo ad adayg dheeri ah. Waa in aad u diyaar garowdo hurgumooyin badan oo kaa hor imaanaya haddii aad isku daydo inaad wax ka bedesho qaabka ay bulshadu u dhaqanto, lana qabsaday haba xumaada’e.

Haddaan soo qaadanno oraahdii caanka ahayd ee Woolrow Wilson oo ahayd *"Haddii aad rabto inaa cadow yeelato, isku day in aad wax bedesho".* Sida ku cad oraahdaan, waxaad dareemaysaa in isbeddelku yahay mid adag oo cadow badan leh, kuwaa oo kaa hor imaanaya ama haddaan si kale u dhigno dad badan oo kaasoo horjeensanaya, kuwaa oo isku deyaya inay ku niyad jebiyaan, ayna dadaalkaaga ka dhigaan mid aan guulaysanayn. Isbeddellada qaybtood, waxay qaataan muddo dheer, suuragalna waxaa ah in ay ka faa'iidaan jiilka ka dambeeya kuwii halganka isbeddelka bilaabay.

***Hadaba waa qoladee kuwa ka horyimaada isbeddelka ?***

Dadka badanaa ka horyimaada isbeddelka waxay noqon karaan kuwo leh ujeeddooyin kala geddisan. Waxaana ka mid ah qaybaha soo socda:

1. Kuwo ka cabsanaaya inay waayaan faa'iidooyin ay markaas haystaan
2. Kuwo ka baqaaya inay waayaan xilalkooda iyo jagooyinka ay markaas joogaan
3. Kuwo cabsi ka qaba meesha loo socdo ee aan la hubin amaba
4. Kuwo ka baqaaya in doorkooda ama kaalintooda la yareeyo.

Haddii aad rabto in aad ka guuleysato caqabadaha kaa hor imaanaya isbeddelka aad doonayso, waa inaad samaysaa dhowr arrimood oo ay ugu horrayso

1. In aad fahamto ama aqoonsato cidda diiddan isbeddelka, iyo

2. In aad fahamto sababta ay u diiddan yihiin isbeddelka?

Sidoo kale waa in aad leedahay qorshayaal cadcad, aadana ka ficiltamin caqabaddaha kaa hor imaanaya, saadna wakhti sii saa fahamsiinta iyo sharraxaada qorshayaasha isbeddelka aad doonayso. Waxaan xasuustaa 2010 mar aan magaalada Gaalkacyo ee gobolka Mudug kaga qayb galay aqoon isweydaarsi, in hooyo aan magaceeda ka xasuusto Xaawo, kana mid ahayd dadkii hawl wadeennada ka ahaa aqoon isweydaarsigaas ay nooga sheekaysay arrin la xiriirta Gudniinka Fircooniga ah ee Gabdhaha. Arrinkaas ayaa ahaa isfahmiwaa ay kala kulmeen dumarka hawlahaas ku hawlan oo ay shir ugu yeereen kana codsadeen inay hawlahaas joojiyaan, se iyaguna uga cawdeen in howlahoodii hadda ayba qabtaan dad kale oo ayba ka dacwoonayaan in hawshoodii laga qaaday ama laga dhacay.

Sidaas darteed mar walba waxa loo baahan yahay farsamo xeeladaysan oo la jaanqaadi karta isbeddelka loo baahan yahay iyo xal u helidda dhibaatooyinka markaas taagan. Sidoo kale ma

jiro xal ku wada haboon dhammaan dhibaatooyinka markaas taagan iyo isbeddelka bulsho ee loo baahan yahay.

Waxaa jirta sheeko la yiraahdo “Marka aan Aasbiriinku Waxba tarin”. Sheekadaan ayaa ku saabsan takhtar markii uu bukaan u yimaado u qori jiray kiniinka loo yaqaan ***Asbiriin***, maaddaama dawada keliya ee uu haystay ay ahayd kiniinkaas, taas oo ka caawisay in dad badan ay ka bogsoodaan xanuunnadii markaa ay dareemayeen oo ahaa kuwo yaryar, se ay in badan oo ka mid ah waxba ka tari waayeen xanuunnadii ay ka cabanaayeen; inkastoo ay qaateen Aasbiirin badan. Waxaa sidoo kale dhacday in qayb dadkaas ka mid ah uu xanuunkii ku sii xumaaday maaddaama ay qabeen cudurro ay dhib ku tahay isticmaalka Aasbiriinka, sida cududrada Gaastariiga oo caloosha ku dhaca, kelyo xanuun iyo madax xanuun dejin u baahan (Stress). Sheekadaan waxaan u soo qaatay inaan muujiyo  sida ay arrin walbaa ugu baahan tahay xirfad iyo aqoon gaar ah taas oo lagula tacaalo ee aysan jirin in xal loo isticmaali karo meel kasta.